

Naafanimada, Dhaqanka, iyo Habka Loogu Adeegi Karo Bulshada Soomaliyeed ee Toronto.

Machadka Roeher

Luulyo 2004



Mahadnaq:

Machadka Roeher wuxuu u mahadcelinayaa shaqaalaha ururka Community Living Toronto daalka ay muujiyween iyo gacanta ay ka geysteen hirgelinta mashruucan. Sidoo kale, waxaa mahad gaar ah usoo jeedinayaan Bob Ferguson, Karen Cloer, Petra Asfaw, Lorry Cumming, Paul Samson, David Pitt iyo Layla Ibrahim.

Waxaa kaloo lagu mahdinayaa dadka faraha badan oo siyaabaha kala duwan uga qeybgalay mashruucan oo howsha geliyay waqtigooda qaaliga ah, afkaartooda iyo xogogaalnimadoodaba, siiba inta lagu jiray howsha wareysiga shaqsiga ah ama kullannada-kooxooda. Waxaa hubaal ah in dadkaas la'aantooda ayan marnaba suuragelin laheyn meelmarinta mashruucan.

Naafanimada, Dhaqanka, Iyo Habka Loogu Adeegi Karo Bulshada Soomaliyeed ee Toronto.

Qulaasadda Daraasadda:

Dokumentigan waa qulaasad daraasad horey looga sameeyay naafanimada, dhaqanka, iyo habka loogu adeegi karo bulshooyinka Soomaalida, Tamiilka iyo midda Shiineeska ee ku nool magaaladda Toronto. Mashruucan wuxuu baarayay dareenka ay seddexda qolo oo lasoo xusay ay ka qabaan naafanimada iyo xiriirka xubnaha bulshooyinkaas ka tirsan ay la qabaan hey'adaha adeegga bulshada ee magaalada Toronto.

Ujeeddada mashruucan laga lahaa waxey aheyd:

1. In hey'adaha mashruucan maalgeliyay oo rabeen iney fahmaan sida ay xubnaha ka tirsan bulshooyinka Soomaalida, Tamiilka iyo Shiineeska ula dhaqmeen dadka naafada ah.
2. Isla hey'adahaas oo ay rabeen iney ogaadaan haddii ay hey'adaha adeegga bulshada ku guuleysteen ama ku fashileen gaarsiinta adeegyada lagama maarmaanka ah oo bulshooyinkaasi u baahah yihiin.

Ujeeddada kama dambeysta ah ee mashruucan waxey aheyd in la fahmo fekerka, dareenka iyo dhaqanka dadka naafada ah ee ka tirsan beelaha dhaqannada kala duwan iyo sida ay ula dhaqmaan hey'adaha adeegga. Siiba, waxaa la rabay in la garto saameynta fekradahaas iyo dhaqannadaas ay ku yeeshen nololsha dadka naafada ah iyo qoysaskoodaba. Sidoo kale, ujeeddada waxey aheyd in talo laga bixiyo tilaabooyinka ugu haboon oo caawini kara hey'adaha adeegga iney si wax ku ool ah ugu adeegaan beelaha dhaqannada kala duwan ee ku nool Toronto.

Mashruucan wuxuu ka koobnaa afar qeybood:

1. Kow, dib-u-eegidda qoraalda dhaqameedka kala duwan ee ku aadan fekerka iyo dareenka laga qabo naafada ka tirsan bulshooyinka Soomalida, Tamiilka iyo Shiineeska ee ku nool magaalada Toronto. Sidoo kale, muraadka dib-u-eegiddaas waxay aheyd in lagu ogaado waxa ay barayaal hore ka qoreen sida wax-ku-oolka ah oo he'yadaha adeegga iyo kuwa talobixintaba ay ula macaamileen dadka dhaqannada kala duwan.
2. Labo, eegita talobixinnada laga sameeyay xubnaha bulshooyinka Soomalida, Tamiilka iyo Shiineeska inta baaristu socotay si loo helo ka qeybgal wax ku-ool ah.
3. Saddex, eegista wareysiyada hore loola yeeshay dadka bixiya adeegyada kala duwan, si loo ogaado dhibaatooyinka ay dadka muhaajirta ah la kulmeen lana fahamo sida adeegyadii hore loogu fidiyay ay waxtar u yeeshen.
4. Afar, xogwareysiyo lala yeeshay dadka naafada ah iyo qoysaskooda, iyo ururrada bulshada ee bulshooyinka lasoo xusay.

Natiijooyinka Muhiimka Ah

- Sida badan, xubnaha ka tirsan bulshooyinka Soomaalida, Tamiilka iyo Shiineeska waxey awood u helaan adeegyada caafimadka iyo dib-u-dhiska jirka iyo maskaxda (rehabilitation), mase helaan adeegyada qaarkood sida gargaarka guriga (home care) iyo tas-hiilaadka meelha nasashada.
- Maadaama shaqsiyaadka iyo qoysaskaba ayan garan karin sida uu nidaamku u shaqeeyo iyo adeegyada jiri karaba, waxey u baahan yihiin inay xogogaal u noqdaan habka ay ula xiriiri lahaayeen xafiisyada adeegyada kala duwan, sida Hey'adda Gargaarka Naafada Ontario iyo Xarummaha Gargaarka Bulshada oo ku lamaanan midda gargaarka caruurata.
- Inkastoo qolooyinka kala duwan ee baaristan quseeya ay qabaan tas-hiilaad horumaray (sida xafiisyo iyo qalab), haseyeeshee tas-hiilaadkaasi kuma ay filna haqabtirka baahida ay dadka naafada ah iyo qoysaskooduba ay qabaan.
- Tilaabooyin wax ku ool ah ayaa dhowaan beelaha daraasadan quseysa oo dhan ka qaateen ee ku aadan sidii loo abaabuli lahaa adeegyada ay u baahan yihiin dadka qaba cudurrada maskaxda. Sidaas darted, waxey abaabuleen aqoon-kororsiyo ku wajahan naafooyinka kala duwan sida naafada caqliga.
- Si ayan dhibaato ugu keenin ama ay uga xannibin fursadda qaadashada muwaadinimada ama damaanashada (sponsorship) ayaa qolooyinka daraasdan quseysa la sheegay iney ka gaabsadan sheegista qofka naafada ah oo qoysaskooda ka tirsan.
- Inkastoo fekerka qaarkood ay ku xiran tahay heerka tacliinta ee shaqsiga arrinta quseysa, haddana waxaa jirta in dadka qaarkii ay naafo-maskaxeedka (intellectual disability) u nisbeeyaan iney tahay arrin Rabbaani ah. Sidaas darted, doodgelinta arrintaasi waxaa loo qaadan karaa iney tahay mid lagu shaki gelinayo awoodda Ilaahey.
- Muhaajiriinta cusub oo ka tirsan qolooyinka lasoo xusay ayaa waxey inta badan u baahan yihiin in laga gargaaro xogna laga siiyo dugsiyada ay caruurtooda naafada oo Afk Ingiriiska ku hadlin ay geli karaan.
- Waxaa lagu warbixiyay in naafooyinka ka tirsan bulshooyinka lasoo xusay ayan ka helin hey'adaha adeegga gargaarka ay u baahan yihiin, balse ay gargaakaasi ka helaan qoysaskooda.
- Shaqsiyaadka iyo qoysaskaba waxey ka qabaan rajo in qofka naafada ah la daweyn karo. Haseyeeshee, marka ay muddada daweynta oo qofka u baahan yahay ay sii dheeraato ama uu qofka uu u baahdo kursiyada-lagu-socdo (wheelchair), dadku waxay badanaaba arrintaas u qaataan in qofka aanu marnaba kasoo kabsan doonin xanuunka, dabadeedna arrintaasi waxey culeys badan iyo sameeynba ku yeelaneysa qoyska qofka naafada ah.
- Dadku cuqdi ayey ka qabaan qofka naafada ah iyo qoysaskoodaba. Cuqdi-dhaqameedkaas waxaa loo nisbeeyaa iney yihiin kuwo dhaxaltooyo ah. Sidaas darteed, qoysaska waxey doorbidaan in qokooda curyaanka ah ay guriga ku hayaan kana qariyaan fiirmada dadka.

Talooyinka Muhiimka Ah

Ka qayb galayaasha baaritaankan ayaa talooyin dhawr ah ku soo jeediyay wadiiqoyinka ugu haboon oo ay hay'adha adeegyada Kanadiyanka ah albaabada ugu furi karaan jaaliyadooda (beeshooda). Talooyinkaasi ayaa ayaa waxa ay abaarayaan siinta xogta, taclinnta, iyo kasbashada kalsoonida oo ay ka mid yihiin qodabada soo socda:

1. In la sameeyo tusmooyin kooban (flyers) oo xumbaarsan xog kooban oo qeexeysa ururka waxa uu yahay iyo adeegyada uu qabto. Tusmooyinkaasi ayaa mudan in lagala tashada ururrada beelo dhaqameedyada iyadoo nuqulka kowaad lagu tijaabinayo qaybo ka mid ah goobaha ay beelahaasi deggan yihiin.
2. In la sameeyo tusmooyin kooban oo sharraxeysa garashada-dhiman una adeegaysa kooxo gaar ah, tusmooyinkaas oo lagu micneynayo arrimaha qaarkood oo lagu xusay warbaxintan. Mathalan, sida Soomaalida loogu kala caddayn karo tafriiqa ku jira caqliga dhiman iyo xanuunka madaxa gala. Waxaa kaloo laga shidaal qaadan karaa qoraalada taxanaha oo Ururka Caafimaadka ee Xanuunka Maskaxda Kanada kasoo saaray arrimahaas.
3. In lala yeesho xiriir joogta ah ururrada beelo dhaqameedyada jira iyo hawlwadeenada ka shaqeeya dejinta (settlement workers) oo diyaarka u ah inay waqtigooda iyo hantidooda ay geliyaan sidii loo baran lahaa cudurrada caqliga, una xiriirin kara hey'adaha iyo shakhsiyaadka naafada ah iyo qoysaskoodaba, islamarkaana gaarsiin kara tusmooyinka.
4. In la agaasimo, sida ugu suurta badan adeegyada loo baahan yahay la gaarsiiyo macaamisha iyadoo la istacmaalayo luqadda kowaad ee beelahaasi lagana kaashanayo mutarjum ama shaqaale si' wanaagsan ugu hadlayo afka beeshaas.
5. In lala yeesho xiriir wanaagsan dugsiyada ku yaala nawaaxiga Toronto si adeegyada loo gaarsiiyo beelaha quseeya, taasoo wax weyn ka qaban doonta sare u qaadista lahaa in la wajaho baahida ay caruurta socotada iyo dhalinyarada aan dhamayn.
6. Waxaa jira laba nooc oo dhibaato ee xagga wargelinta ah oo beelaha laga tirada badan yahay ay la kulmaan: (1) Culayska ah in la tiigsan karo shaqsiyaadka iyo qoysaska ku xiran ururrada dejinta beelo-dhaqameedyada, goobaha lagu ciyaaro, iyo ururada ku dhisan dhaqanka. (2) Culayska ah in la tiigsada shaqsiyaadka aan dhamayn iyo xubnaha caa'iladooda ee aan doonayn in ay tagaan ururradaasi iyadoo ay ugu wacan tahay in dhaqanka beelhooda oo magacyo gaar ah u samaynaya. Sidaasi darteed waxaa loo bahan yahay istraatiijiyad baahsan suuragelin karta in la gaaro ama la tiigsado tirada ugu balaaran.
7. Isticmaalidda tiigsashada iyo ilha laga heli karo ururada bixiya adeegyada kooxha gaar ahaaneed. Ururo badan oo aan waraysiyo la yeelanay ayaa ballan qaaday inay taakulayn iyo madalba ku yaboohayaan si ay u socdsiiyaan aqoon-is waydaarsiyo looga hadlo xagga tacliinta.

8. Waxaa la muujiyay in la abuurto VIDEO ay shaqsiyaad ka kala socda Soomaali, Tamiil, iyo Shinees ay uga waramaan sheekooyinkooda. Iyadoo ay jirto in beelaha dhexdooda ay ku kala gudban yihiin xeendaabyo ayaa haddana ay jiri kartaa fursad ah in xubnaha beelahaasi ay iska arki karaan arrimaha isku midka ah ee haysta si ay uga gudbaan gidaarka ku kala gudban.
9. In seddexda beelood ee aan soo sheegnay ayaa waxaa ay ka dheragsan yihiin xagga wargaysyada, rugaha internetka, iyo dhagaysiga raadiyaha. Gaar ahaan Soomaalida oo aad u dhagaysta raadiyaha tobaadlaha ah ee CHIN (AM1540) oo soo gala maalmaha axadaha ah. Sidoo kale ayaa CHIN waxa ka baxa luqadaha Shineeska maalmaha todobaadka 1:00 – 6:00 PM. Iyadoo beelaha Taamiilku ay dhagaystaan raadiyo gaar ahaaneed oo ay ka iibsan karaan dukaamada ay Taamiilku ku leeyihiin magaaladan Toronto. Wadiiqooyinkaasi ayaa lagu higsan karaa shaqsiyaadka ka baqanaya inay caawimaad waydiistaan ururrada ay leeyihiin qowmiyadahooda.
10. In wada shaqayn lala yeesho ururrada qowmiyadaha kala duwan si loo abuurto kooxo taakulayn ah oo gargaara shaqsiyaadka dhiman iyo caa'iladooda. Taasi waxay suurto gal ka dhigaysaa inay kasoo baxaan dhuumashada si ay gacansaar ula yeeshaan kuwa kale oo ay haysato xaaladooda oo kale.
11. In lagu dhiirigeliyo shaqaalaha inay dhawraan korosiga macluumaadka soo baxa ee ku tacaluqa adeegyada bini'aadmiga, isla markaasina la siiyo fursad shaqaalaha ay aqoon korosiga ku dalbadaan. Abuurista dhan waxbarasho ayaa caawimaysa ururrada inay la saan qaadaan baahida isbedelaysa ee dadwyawga kala duwan ee ku dhaqan magaaladan Toronto.

Arar:

Magaalada Toronto iyo nawaaxigeeda ayaa waxay si joogto ah u tahay halka ay usoo haajiraan socotada timaada dalkan Kanada. Boqolkiiba afartan-iyo-afar (44%) ee dadwaynaha ku dhashay dibadda Kanada ayaa manta ku nool Nawaaxiga Toronto-Weyne (NMT). Waxaa dhinaca hayaanka Toronto tartan kula jira magaalada Vancouver oo tiro saami ahaan qaabishay boqolkiiba soddon iyo sideed (38%) ee dadka dibadda ku dhashay ee usoo haajiray Kanada (Statistics Canada, 2003). Hay'adda United Way ayaa ku warbixisay in waloow ay Toronto lagu ay deggan yihiin 50 NMT (Clement, 1999).

Saamiga dadweyne oo heerkiisu sidaas u sareeyo oo kala leh shaqsiyaad iyo qoysas dhaqanno, luqado, diin iyo caadooyinka kala duwanba ayaa waxay caqabad dhab ah ku tahay hey'adaha bixiya adeegyada bulshada ee nawaaxiga Toronto. Ururada adeegyada ayaa waxa ku waajib ah in ay ka qayb galiyaan dadka cusub ee isticmaalya adeegooda iyagoo u muujinaaya qaddarin baahidooda gaarka ah ayna islamaahaantiina ku xadgudbeyn xuduudkooda.

Baahidan laba geesoodka ah ayaa u muuqata inay tahay mid aad muhiim u ah xaaga maamulka iyo maareynta dadka caqligooda dhiman yahay.

Aragtiyo kala tagsan ee ku wajahan rumaynta caqiidada ay ka aaminsan yihiin caqliga dhiman iyo xanuunka maskaxda gala ayaa ah kuwa soo jireen ku ah qowmiyadaha kala duwan oo ku nool NTW (Nawaaxiga Toronto Wayne). Shaqsiyaadka qaba caqliga hooseeya ayaa waxaa ay dhaxsiisay inay bulshada kala kulmaan tixgalin la'aan ku salaysan waxa ay dadka reer galbeedka ugu yeeraan iin aanu sal lahey iyo malo-awaal.

Rumayntan noocaasi ah ayaa waxaa ka mid ah in caqliga dhiman iyo xanuunka madaxa galaba ay yihiin ciqaab Rabaani ah ama tijaabo imtixaan ka dhashay inay degaan rowxaaniyad ka timid markii ay haweenayda uurka lahayd ay aragtay ama ay taabatay shakhsi curyaan ah; ama taranka oo xumaaday awgeed.

Caqiidadaasi ayaa waxaa ay keenaysaa in dhaqmadaasi kala duwan ay ku kala duwanaadaan fikirka ay ka qabaan caqli-dhimanayaasha iyo dadka maskaxda ka jiran. Islamaahaantaasi, mujtamac kasta waxaa ka go'an in dadka maanka dhiman ay ka reeban ama inayan si buuxda uga qayb qaataan meelaha muhiimka ah ee bulshada iyo nololaha ijtimaaciga ahba. Kanada ayaa waxaa lagu sheegaa, marka la eego sida ay ula macaamisho dadka dhiman, inay dhinacaas liidato diiwaankana ugu qoran tahay gaar ahaan marka laga eego ka qayb galin la'aanta dadka dhiman xagga hayadaha, iyo halka ay ku jimicsadaanba, iyo iyagoo loo diido xuquuqda aasaasiga ah ee biniaadmiga, mathalan xaqa ay u leeyihiin inay guursadaan, yeeshaan caruur, ama ay noqdaan milkiilayaan guri. (The Roeher Institute, 2003, 11).

Taariikhda dadka caqligooda dhimana yahay ee dalka ku nool ayaa muujinaya in caqabadda ugu wayn ay tahay ka mid noqoshada bulshada oo ay ugu wacan tahay in aanay lahayn aragti iyo awood wax qabad, balse aanay ahayn mid shaqhsiyadeed. Caqabadaha ugu wayn ayaana ah kuwa dibadda kasoo wajahaya balse aanay ahayn kuwa shaqsiga kaga imaanaya dhimanaanta caqligiisa.

Caqabadahan oo kale ayaa iyana ku badan dadka laga tirada badan yahay. Waayoaragnimada bulshada qawmiyadaha leh dhqamada kala duwan ayaa waxa ka jira dhibaatooyin badan oo kicinaya inay takooraan dadka markaasi lagu qeexo in ay kala duwan yihiin. Baahidaasi iyo dhibaatooyinkaas ayaa waxaa ka mid noqon kara in aanay jirin goobo lagu barto luqadaha Ingriiska iyo Faransiiska, tababar iyo aqoon la'aan ku jihaysan mihnadahooda, xog la'aan ku saabsan hey'adaha ijtimaaciga ah, qaabka maamulka iyo taageeridda, yaraanta gacansaarka ay ku leeyihiin wadankan cusub / gobolka / magaalada gaar ahaan dadka qaxootiga oo ay haysato: cadaadinta maskaxeed ee kaga timid argagaxii qulqulatooyinka, kala firdhadkii qooyasaska iyo sida degdegga ah oo ay uga soo carareen wadankooda.

Waxaa kaloo muhiim ah in la xuso caqabadahaasi aad ka helayso hay'adaha ijtimaaciga iyo goobaha laga fuliyo siyaasadaha oo ay weliba ku qoran tahay in ay bixiyaan adeegyada ay u baahan yihiin dadka naafada ah. Hey'adahaasi ayaa ah kuwa albaab ku gudban ilaha waxtarka u ah dadka u baahan si ay ugu guulaystaan in ay noqdaan kuwa aan laga madaxbanaan. Caqabadahaasi ayaa waxaa ka mid ah kala takooridda suuqa xoogsata, grawsi la'aan aqoonta waxbarasho iyo tababar ay kala yimaadeen dibadaha Kanada, ciriiri guri oo ay awoodi karaan in ay iska bixyaan (Clement, 1999, 14) iyo gabaasi barnaamijyada degista socotada. (Reitz & Lum, 2001)

Walaow Kaneediyanka cusub aanay dhamaantood dhibaatooyinkaasi la kulmin, ayaa waxaa ay u muuqataa shaqsiyaad iyo qoysas badan inay u baahan yihiin gargaar gaar-ahaaneed, inay haddana muuqato in badankood ay la kulmaan dhibaataadaasi.

Waa tan kaliftay in Community Living Toronto, iyo Roeher Institute ay arji u qortaan United Way of Greater Toronto si' ay maalgelin ugu sameeyaan mashruuc lagu abaarayo qaddiyadaha qaabdhismeedka iyo dhaqanka dadka naafada ah si' loo ogaado baahida iyo waayo-aragnimada ay qoowmiyadaha laga tirada badan yahay ee Toronto dadaka xagga caqliga naafada ka ah. Haddii aan si toos ah u abaaro, mashruucan waxaa baaritaan ku sameeyay beelaha Shiineeska, Taamillka, iyo Soomaalida ee ku nool magaalo-waynta Toronto. Tafaasiisha macluumaadkaasi ee ku xigta arartan ayaa googol dhig u noqon doonta warbixinta kama dambaysta ah ee mashruucan.

I. Tifaftirka Mashruuca

B. Ujeedada Warbaxinta

Warbaxintan waxaa ay soo bandhigaysaa, tafaasiil iyo munaaqishooyin ka bixinaysa mashruuca cinwaankiisu yahay barta ay isaga gudbaan fahamka dhaqanka naafada, bixinta adeega iyo muwaadinka shaqsigu naafada ah ee ka mid ah beelaha socotada ah. Warbaxintan waxaa ka mid ah: (1) qulaaso laga soo qaatay dib-u-eegid lagu sameeyay qoraalada laga sameeyay mashruucan, (2) Munaaqashooyin iyo falanqeyn lagu sameeyay baadigoobayo lagu xaqiijinayo waxyaabaha la rumaysan yahay, faltanka iyo dhibaatooyinka ay la kulmaan walidiinta ka soo jeeda dadka laga tirade badan yahay ee haya caruur naafada ah. (3) Munaaqishooyin iyo falanqeynta qoraalada kazoo baxay dodo-kooxeedyada iyo waraysiyada lala yeeshay shaqsiyaad ku sifoobay inay ka mid yihiin beelaha laga tirada badan yahay ama ururada bixiya adeegyada xubnaha kooxahaasi, iyo (4) Talo-soojeedinta iyo Talaabooyinka mustaqbalka la rabo in la qaado.

T. Baaxadda iyo Ujeedada Mashruucan

Mashruucan waxuu diiradda saaray laba su'aalood oo waa way nee soo soda:

1. Sidee feker-dhaqameedka beelaha ee ku aadan naafonimada ay u saameenaysaa ugu shaqsiyaadka naafada ah eek u dhexnool iyo sidee loo arkaa marka ay doonayaan in ay gargaar ka helaan hey'adaha adeegyada bixiya?
2. Sidee garasho la'aanta dhaqanka iyo aragti-xumada laga qabo dadka naafada ah ay u wiiqaysaa in shaqaalaha bixiya adeegyada bulshada ay gargaarkooda iyo adeegyadooda lagama maarmaan ah in gaarsiyo muhaajika dadka laga tira badan yahay si uu u noqdo muwaadin kaamil ah?

Ujeedooyinka Mashruucan ayaa waxey aheyd:

- In la helo faham xagga fekerka ah eek u wajahan rumaynta ku tacaluqda naafada garashada ee dadyowga beelaha Taamiilka, Shiineeska, iyo Soomaalida.
- In la diiwaan galiyo waayoaragnimada laga dhaxlo beelahaasi ee la xiriira adeegyada bulshada ee magaaladan Toronto.
- In la fahmo sida labadaasi arimood – (1) fakirka iyo rumaynta, iyo (2) la macaamilka adeeg bixiyayaasha – ay saamayn ugu yeelan kartaa nolosha naafada garashada ee dadka midabkooda lagu soo sooci karo iyo qoysaskoodaba.
- In talo howlgal ah laga siiyo hey'adda Community Living Toronto iyo hay'adha kale ee bixiya adeegyada si' ay si wax-ku-ool ah ula macaamilaan beelaha laga tirada badan yahay ee magaalda Toronto.

II. Qaabeynta Mashruuca

B. Habraaca Daraasadda

Inta lagy jiray daraasadda mashruuca waxa la raacay tilabooyinka soo socda:

1. Waxaa dib-u-eegid lagu sameeyay qoraalo-dhaqameedyo kala duwan, si loo ogaado dabeecadaha iyo fekradaha ay dadka ka tirsan dhaqannada qaarkood ka qabaan dadka naafada iyo in la ogaado dhibaatooyinka ay dadkaasi la kulmi karaan. Sidaas darteed, waxaa la baadigoobay daraasaddahii hore looga sameeyay arrimaha bulshada sida dhaqannada iyo cafimaadkaba oo maktabadaha Jaamacaddaha York iyo Toronto, iyo bogagga-elektronikada ku keydsan. Sidoo kale waxaa la baadigoobay maqaallo ku saabsan adeegyada bulshada iyo eray-bixinnadada ay istacmaaleen (si kuwa Soomaaliga ah loogu beddeli karo Tamiilka ama Shiineeska) si loo ogaado micnaha ereyadaas, fekerka iyo dareenka laga qabo dadka naafada ah; fekerka dadka muhaajiriinta ay ka qabaan adeegyada bulshada, siiba qaababka ay hey'ada caafimaadka ee Waqooyiga Mareekanaka iyo Yurubkaba ay istacmaaleen iyadoo fiiro gaar ah la siinayo dadka Soomaalida iyo Tamiilka eek u nool dalka Ingriiska.
2. Sidoo kale, si' looga helo kaalmo iyo xogogaalnimoba, waxaa lala xiriiray wadatashina lala sameeyay bulshooyinka muhaajiriinta ah ee arrintaas quseeysa. Wadatashigaas oo sameeyeyay qaab wareysi ah oo si wadajir ah waxaa kasoo qeybgaleen baare ka socda Machadka Roeher iyo wakiilo ka tirsan Community Living Toronto iyo xubno ka tirsan ururrada qolooyinka mashruuca quseeya.
3. Waxaa wareysi lala yeeshay dadka adeegyada kala duwan u fidiya dadka naafada ah iyo qoysaskooda oo ka tirsan bulshooyinka muhaajiriinta ah ee arrintaas quseeysay. Ujeeddada wareysiga waxey ahayd in xogogaal loo noqdo sababta hey'adaha adeegga qaarkooda ay ku guuleysteen inay xiriir wax ku ool ah la yeeshaan dadka lasoo xusay ee ku nool Toronto, sidoo in la ogaado meelaha ay he'adaha qaarkood ay ku fashileen.
4. Waxaa ururrada bulshada iyo shaqsiyaad ka tirsan bulshooyinka lasoo xusay lala sameeyay baadigoob (surveys) qoraal ah oo qoto dheer. Baadigoobyada quseysa shaqsiyaadka waxaa lagu turjumay luqooyinka Soomaali, Tamiil iyo Mandarin, meesha kuwa loo gudbiyay hey'adaha adeegga lagu qoray afka Ingiriisiga oo keliya. Baadigoobka waxaa sameeyeen shaqaale ka tirsan Community Living Toronto, Machadka Roeher iyo dad la shaqeeya CLT iyo ururrada adeegga ee beelaha muhaajiriinta. Marka la falanqeynayay badigoobyadaas waxaa la istacmaalay habka SPSS nooca 10.5.
5. Lix kullano xog-wareysi ah ayaa lala yeeshay:
 - b. Dad naafo ah ee u dhashay Shiinees iyo qoysaskooda (ka qeybgalay: 10 shaqsi iyo/ama xubnaha qoysaskooda);
 - t. Shaqaale ka tirsan xarrunta caruurta oo ku taqasusay la shaqeeynta beesha Shiineeska ee Toronto (ka qeybgalay: 10 shaqaale);

j. Dad naafo ah ee u dhashay Tamiil iyo qoysaskooda (ka qeybgalay: 20 shaqsi iyo/ama xubnaha qoysaskooda);

x. Xubno ka tirsan ururrada adeegga ee Tamil iyo ururro la shaqeeya beelsha Tamil (ka qeybgalay: 11 shaqeeya);

q. Dad naafo ah ee u dhashay Soomaali iyo qoysaskooda (ka qeybgalay: 4 shaqsi);

d. Xubno ka tirsan ururrada adeegga Soomaalida iyo ururrada aan-aheyn Soomalida oo laakinse adeegyo kala duwan u fitya beesha Soomaalida (ka qeybgalay: 4 oday).

Wareysiyada dhammaantood, marka laga reebo kan Shiineyska, waxaa fuliyay maamulaha Machadka Roher isagoo kaashanayo Community Living Toronto. Ka qaybgalayaasha waxaa lagala xiriiray cinwaanadooda shaqsiga ah ama xagga telephoonka, e-mailka, iwm., waxaana loo gudbiyay qoraalo lagu tarjumay afafka Shineeska, Soomaaliga, iyo Tamiilka.

III. Natiijooyinka Mashruuca

B. Astaamaha u Gaarka ah Beelaha laga Tiro Badan Yahay

Daraasado badan oo ay sameeyeen waaxyaha ku taqasusay talabixinta ayaa lagu xusay sida ugu haboon oo hey'adaha adeegga u bixin karaan adeegyada kala duwan ama ay u sahli karaan disidda xiriirwanaagga loo baahan yahay inuu dhexmaro dadyowga ka tirsan dhaqannada kala duwan iyo adeeg-bixiyaha, si ay muhaajiriinta dalka ku cusub ay uga gudbaan dhibaatooyin maalmeedka iyo is-afgarawaagga la xiriira is-maandhaafka dhaqannada kala duwan.

Waxaa mathalan la tilmamay iney muhiim tahay in hore leysku taxalujiyo abuurista xiriirwanaagga adeeg-bixiyaha iyo loo adeegaha. Sidoo kale waxaa sugnaatay in ka guulgaarista daweynta ama dib-usoo-nooleynta qofka bukaanka ah ay ku xiran tahay hadba dadaalka shaqsiyeed oo adeeg bixiyaha muujiyo iyo nooca tekniiga uu istacmaaloba (Beimas, 2000).

Waxaa kaloo la xusay iney aad muhiim u ah in kullanaada ugu horeeya ee adeeg-bixiyaha iyo loo adeegaha in la helo tabaha lagu kasban karo is-afgarad buuxa. Badanaaba, kullanda ugu horeeya waa kuwa xasaasi ah oo shaqsiga loo-adeegayo lagu weydiinayo su'aalo shaqsi ah oo la xiriira qof-ahaantiisa ama beesha uu ka tirsan yahay. Waxaa kaloo muhiim ah marka la fanaqeynayo ama qeymeynayo xogtaas in la tixgeliyo raadka ay qofkaasi ku yeelatay deegaanka uu hore ugu noolaa iyo sida uu ula qabsaday bey'adda cusub (London & Devore, 1988, 314).

Waxaa sidoo kale lagama maarmaan ah, in inta adeeg-bixiyaha uusan weli gudagelin howshiisa, inuu ku kasbado kalsoonida qofka muhaajika ah ama qaxootiga ah; inuu horey u og yahay waxyaabaha aasaasiga ama xassasiga ah ee saameeyay noloshiisa. Arrimahaas la'aantooda way adkaan doonto meelmarinta hoowlaha la xiriira dejinta iyo la qabsashada deegaanka cusub. Mathalan, daraasad ay dhowaan hey'adda Roher sameysay waxaa baarayaashu ogaadeen in qoys muhaajir ah uu diiday in gabadhooda oo qabtay cudur la xiriirta dibudhaca korrimada ay ka dhega-adeegeen istamaalka adeegga ururrada qaabilsan maadaama ay ka baqayeen in haddi xaaladda gabadhooda la ogaado ay xannibi kareyso fursadda in gabadhooda ay ku damaanato

(sponsor) qofka ay guursan doonto. Fekerkaasi, waa mid dadka muhaajirka badankooda ay wada qabaan maadama ay aaminsan yihiin in istacmaalka hey'adaha adeegga naafadda ay dhib u keeni karto mowqifkooda socdaalka (Roeh Institute, 2003, 10).

Qoysas qaarkood oo nasiib u helay ama loo oggolaaday iney Kanada lasoo galaan cunug naafo ah ayaa waxey ka gaabsadan iney cunugooda ay tusaan he'adaha naafada maadama ay ka baqayeen in arrintaasi loo tarejuntay in kharash badanna lagu bixin doonoo. Isla dareenkaasi waxaa qaba qoysas caruur naafo ah ugu dhashay Kanada soo haajidooda kaddib.

Isla darasdaas waxey tilmaantay in aqoon la'aanta Afka Ingriiska ay xannibaad weyn u keeni karto istacmaalka adeegyda. Is-afgarasho waaga labada dhinac waxay keeni kartaa qeymeyn aan sugneyn iyo in si buuxa loo garan waayo tilmaamaha la bixiyay. Aqoon la'aanta afka Ingriiska waxey kaloo dhimaal u keeni kareysaa inuu qofka uu si wanaagsan u guto waajibaadkiisa, taasoo ay aad uga duwanaa laheyd haddii uu isla qofkaasi howshaasi ku fulin lahaa afkiisa hooyo (Roeh Institute, 2003, 16).

Qilaafaadka dhaqameed oo inta badan daraasadaha la xuso waxaa ka mid ah in dadka ku nool Yurubta iyo Waqooyiga Mareekanka ay aad u hoos xariiqaan qeymaha iyo xuriyadda qofeed, meesha beelaha laga tiro badan yahay ay qeymeeyaan ama ay culaabta saaraan qeymaha qoyska iyo beesha.

Qoraaga Thompson (1997) wuxuu dadka u ifiyay in baahida ay dadku u qabi karaan adeegyada kala duwan ay ku xiran tahay hadba sida aragtidooga shaqsiyeed ay u jiheysan tahay, taasoo isagaas u kala soocay mid madaxbanaan ama keli-ahaaneed ah (independent) iyo mid iskaashi ku dhisan (interdependent). Dhaqannada xogga saara madaxbanaanida qofeed waxaa mithila afkaarta dabaqada-dhexe ee Mareekanka, Galbeedka Yurub iyo Kanada, meesha dhaqannada iskaashig ku dhisan ay mithilaan Reeraha Asia, Latin America iyo Africa. Aragtida ku saleysan falsafadda Waqooyiga Mareekanka oo mudnaanta siineysa qofka shaqsiga ah, inta badan waxtar weyn uma yeelan karto dhaqannada mudnaanta siiya beesha (16), waxeyna beelahu u arki karaan xadgudub iyo faragelin arrimaha qorsaskooda.

Thompson (1997) wuxay tixday isna isbarbardhigay astaamaha labada dhaqan ee kala ah midda qeymeyneyso madaxbanaanida qofeed iyo midda qeymeyneyso iskaashiga beesha. Shaxda hoos ku cad waxaa laga soo tixraacay qoraaladeeda.

Dhaqannada ku tiirsan madaxbanaanida & Xuriyadda Qofeed	Dhaqannada ku tiirsan beesha / iskaashiga
Waxey qeymeyneysaa afkaarta, dareenka iyo ficillada shaqsiyeed	Ma muujiyan dareenka qofeed & shacuurtooda Gaar ahaaneed eek u aadan beeshooda
Madaxbanaanida afkaarta qofeed	Waxey qeymeeyaan ka tirsanaashaha beesha
Qeymeynta guusha shaqsiga	Waxey xoogga saran yooltiigsiga beesha
Iku filaanshaha aayatiinka qofka	Waxey aaminsan yihiin calafka
Aqoonsiga mudnaanta shaqsiyeed	Xiriirinta & samasocodka Beesha
Tartan & muujinta mudnaanta shaqsiyeed	Ogaashaha meesha uu ka taagan yahay beesha

Marka ay he'adaha adeegga ay la xaajoonayaan qoysaska muhaajiriinta ah oo qabaan caruur naafo ah, tafaariiqda hore loo soo xusay ee waxey keeni karaan dibatooyin ama is-afgarashwaa.

Ka sokow caqabadaha la xiriira aqoon la'aanta luqadda (dhibaataadaas oo inta badan sameysa dadka da'da weyn), waxaa suurooda in qoysasku ayan kalsooni weyn u muujin shaqaalaha ay u arkaan inuusan xogogaal u aheyn xaaladahooda (siiba marka ay aqoon luqadda); sidoo kale, waxaa dhici karta in qoyska ay ka oodan yihiin dibadda ama la xaajoon dad ka baxsan xubnaha reerkooda; waxaa kaloo suurtagal ah in beeshu ay cuqdiyo ka qabaan Kanada iyo dadka reer Kanadaba (The Roeher Institute, 2003, 16).

Thompson (1997, 17) waxay kaloo qoraaladeeda ku xustay dabeecadaha wadar-ahaanteeda ee beelaha waxa ay ku tilmaantay faltanka, waxeyna islamarkaana aqoonsatay labada weji ee iska soo horjeeda ee kala ah kooxda-gudaha (in-group) iyo kooda-dibadda (out-group). Kooda-dibadda (out-group) waxaa ka mid ah xubnaha dadka tirada badan oo muhaajiriintu soo dhexdegen. Iska soo horjeedda labadaas barbar waxey hey'adaha adeegga u keeni kareysaa caqabooyin iyo kalsoonidarroba.

Dhaqan kala duwanaanshaha kuwa adeeg-bixiya iyo loo adeego waxaa mararka qaarkood kallifi kartaa caqabo dheerad ah oo sii xoojisa dhibaataadooda, siiba marka qoyska muhaajirka ah ay arkaan ama tuhmaan in saraakiisha hey'adaha adeegga ay si gaar ah u daneynayaan qofkii naafada ahaa oo ay hore u arki jireen qof kharshaka ku bxaya uu culeys dheeraad ah ku heyn karo maamulka dowladda. Sidaas darteed, si loo kasbado kalsoonida muhaajiriinta waxaa lagama maarmaan ah in dadkaasi xogwaran buuxa laga siiyo kaalinta hey'adda adeegga iyo kaalintoodaba (The Roeher Institute, 2003, 24).

Waxaa kaloo lagu soo waramay in dadka naafada ah ee ka tirsan beelaha laga tiro badan yahay iney qariyaan dadakooda caruurtoda naafada ah iyo dadka waaweyn oo naafada ahba, maadaama ay qabaan in arrintaas (naafonimada iyo muhaajirnimoda) ay si laba-jibaar ah u caqabeyn karto, siiba dhanka shaqo helista (The Roeher Institute, 2003, 18).

Sidoo kale, tafriiqa ku kala jira jiilasha kala duwan waxey aad u muuqan karayaan marka dhallinyarada naafada ah ay hantaan ama qaataan falsafad-dhaqameed dalka ay usoo haajireen:

Dadka naafo ah qaarkood waxey doorbidaan iney Kaneedian noqdaan maadaama ay dhaqannadooda hore u arkaan mid dadka naafada ah yasayo. Kuwa kalena waxey aaminsan yihiin inayan ku badbaadeyn qoyskooda ama beeshooda dhexdeeda. Haddii lacalla uu qof shaqaale ah yimaad guriga si uu u caawino cunugga naafada ah, shaqaalahaas wuxuu toos ula xaajoonayaa qoyska. Arrintaas caqabo ayey u keeni kartaa caruurta naafada ah (The Roeher Institute, 2003, 31).

Waxaa jiraan tafaariiq darajooyin heerar kala duwan leh oo laga dhex heli karo beelaha dhaqannada kala duwan gudahooda. Matalan, seddaxda belood oo daraasadan quseysayba waxaa loo arki karaa iney yihiin koox-dibadda ka ah dhaqanka bulsho weynta oo ay soo dhexdegen sida dadka cadaanka ee Kaneedianka ah, haseyeeshee waxaa suuragal ah iney gacan-bidaxeyn (discrimination) badan ay kala kulmaan isla beelahooda. Isla markaasna waxaa suurtagal ah iney isla hal beel ay ka jiraan qilaafaad xagga fekerka iyo dareenka ahba ee ku aadan xagga cimriga kala duwan, sida dhallinyarada, da'da dhexe iyo waayeelka. Matalan, wiilasha dhallinyarada ah ee Shiineyska ah waxaa suuragal ah iney wax badan ay wadaagaan dhallinyarada cadaanka ah oo la filka ah marka loo eego awoowayaashooda maadaama . muddada ay Kanada ku noolaayeen ay raad weyn ku yeelan kareyso dabeecadooda qofeed. Sida ay Sue & Sue (1987, 485) qoraalkeeda ku tiray "in dadka Ashianka ah iyo kuwa Asian-American

isku si loo arko waa qalad maadaama ay kusoo kala koreen dhaqan-hoosaadyo kala duwan oo laba dhabbo oo kala duwan u kala jiheyneysaa.”¹

Waxaad kaloo moodaa in isla beel-dhaqameed (ethnicity) ka tirsan dadka laga tiro badan yahay ay dhexdooda ay qeybo-qeybo kala leeyihiin. Marka laga shidaal qaato qoraalada jira, waxaad moodaa in arrintaasi ay si weyn u quseyn dadka Tamiil-Kaneedianka oo badankooda kasoo wada askumeen Sri Lanka, marka laga reebo Tamiil Naduugu oo kasoo askumeen Indiya. Haseyeeshee, Tamiilka iyo Sinhaleseka waxaa ka dhexeeya qilaafaad la xiriira dagaalada sokeeye ee ka jira Sri Lanka. Sidoo kale, aragtida hore, waxaad moodaa in dadka Soomaali-Kaneedianku ay yihiin dad meel qura kasoo askumay (homogeneous) oo wadaagga luqad qura, diin, taariikdii dagallada sokeeye iyo barakicinba, laakinse waxey u qeybsamaan qabiilo, goboleysi sida reer waqooyi iyo reer koonfur oo iyaduna la xiriirta qabyaalad. Shiines Kaneedianka ku nool Toronto waxey ka kala yimaadeen meelo kala duwan, sida Dhulweynaha Shiineyska (Mainland China), Hong Kong, Taiwan, iyo meelo kale ee aduunweynaha ka tirsan oo dadka Shiinaha ah ay hore ay u ay degeen marka ay soo barakaceen kaddib.

Sidoo kale, tafaariiqda dhaqannada kala duwan ka jiray inta dalakii-hooyo la joogay maka jiri karaan Kanada dhexdeeda. Mathalan, hal nin wuxuu wareysigiisa ku sheegay, Soomaalida muddo tobaneeyo sano waxey u qeybsanaayeen gobollada waqooyi iyo koonfur, haddase waxaad moodaa in arrintaasi laga soo gudbay oo ay Reer Koonfurta iyo Reer Waqooyiga ayan sidii hore isaga dhowyihiin, dabadeena ay haatan tafaariiqdii hore u jiri jiray laga sameeyo xifaalooyin badan oo lagu qoslo.

T. Astaamaha Hey’adaha Adeeg Bixiyayaasha

Daraasad dhawaan lagu sameeyay adeegyada dhaqan celinta ee dalka Maraykanka ayaa sheegaysa in “tirakoob lagu sameeyay adeegyada dhaqancelinta ee loo fidiyay dadka dhaqankooda uu ka duwan yahay wadanka ay martida u yihiin ay muujinayso tiro aad u badan oo natijjo guuldaro ah ku dhamaatay. Dhabtii, waxaa suurtagalnimo sareysa ay tahay in dadka naafada ah ee ka soo jeeda kooxo dhaqameedyo aanay si wacan uga faa’iidaysanayn ama ugu milmi karin adeegyada dhaqancelinta” (Wong-Hernandez & Wong, 2002, 101).

Qorayaasha waxa ay ku muujiyeen qoraalkooda”baahida loo qabo dhaqancelinta shaqaalaha ku takhasusay in ay noqdaan kuwa ka soo dhalaali kara hawshooda marka laga eego arrimaha dhaqamada tirada badan” ayna beegsadaan baahida loo qabo in ay shaqaaleeyaan shaqaale dhaqnkooda uu kala duwan yahay iyadoo lagu kabayo shaqaalaha horay u jiray si “ si ay uga bartaan una garawsadaan qiimaha uu ku fadhiyo dhaqanka shaqsiyaadka laga tirada badan yahay isla markaasina qabatima bixinta adeegga sida loo wajahayo. (“ Wong-Hernandez & Wong, 2002, 101)

Machadka Roeher ayaa maqlay in adeeg bixiyayaasha ay badanaa “ka warqabin baahida gaar ahaaneed ee dadka socotada ah, xataa haddii laga eego magaalooyinka ay ku arkayaan macaamishooda beelaha socotada ah” (The Roeher Institute, 2003, 39). Baahidaasi gaar-ahaaned ayaa awoodda ay ka soo dhexboodi karto midabka, luqadda, dhaqanka, iyo diinta.

¹ Waxaad kaloo fiirisaa, Howard-Hamilton (d/u)

Mathalan, baahida jiil waynaha kowaad ee socotada haweenka ayaa loo adeegsan karaa in si ka duwan loo wajaho jiilasha kala duwan ee Talyaaniga ama Ukraaniyiinta Kanadeeska ah. Is dhexgalka xubnaha beelaha laga tirada badan yahay iyo dhaqamadooda cusub ee ku hareeraysan ay ku abuurikarto dhaqan ah cawinaad raadis, taasna ay keento in ay yarayso in ay wax shuqul ah ku yeeshaan dhaqankoodii hore marka loo eego kuwa soo galootiga cusub ama loo arko kooxa sumad laawayasha ah.

Inta aynu u arki lahayn farqiga mid dhibaato ah, waa in beelaha laga tirada badan yahay ay isbedelaan laf-ahaantooda. Ddaraasado badan ayaa muujinaya in hey'yadaha adeega oo kaliya aanay mas'uuliyad ka saarnayn in ay marxabaysiiyaan baahidaasi kala duwan. Hay'adaha adeegga waxa ay u adeegi karaan in ay ku tacliimiyaan dadkaasi oo kale iswaydaarsi xiriir hawleed dhexmara.

Wang, Sedlacek & Westbrook (2001) ayaa qoray:

U qaadashada qaabka la xiriira kooxaha laga tirada badan yahay ay u horseedayso in saadashooda ay maleeyeen. Haddii macaamiisha ee ka yimid kooxo wata dhaqan kale ee la rumaysan yahay in aanay soo bandhigayn tabashadooda, ku tiirsan, u baahan ururin, higid, talo, iwm., marka ay haboon tahay in loola dhaqmo in arrimahaasi ay dhab yihiin, taasina waxa ay ka jawaabaysaa inay waafaqaan waxa uu doonayo la-taliyaha. Markaasi ayaa loo xaqiijinayaa in heerka ama dhaqanka in lala tiigsado aanu noqonayn mid meesha ka baxa.

Ka qaybgale ka socday urur bixiya adeegga naafada ee daraasad ay horay u samaysay machadka Roeher ayaa muujiyay sida ay u adag tahay in la noqdo "wax walba in loo helo dadka oo idil" waxaa ay dareenkeeda ku muujisay in ururkeeda uu ka marnaa fahamka caqabada dhaqanka, waxa ay awoodi kareen in y meelo kale oo kaga waayo aragsan u wajahaan macaamiishooda

Intii aynu ku hawlanayn daraasadan, ayaa waxaa muuqatay in ururada ku lug lahaa waxqabadka dadka naafada ah ay ka warqabeen xaddiga nusqaanimadooda ee ku salaysan qaabka ay u bixinayaan adeegyadooda. Walow aanay ka marnayn in fikrado qaldan iyo wax aanan jirin laga rumaysnaa, ayaa haddana si niyad wanaag ah waxa ay saamayn ugu yeelatay isku daygooda in ay fahmaan dhaqamada kala duwan. Dabqaadka mashruucan ayaa ka dhashay rabitaanka niyad wanaagga ee ah isku dayga in la fahmo si loo fududeeyo is bedel.

Markii hore mashruucan, mid ka mid ah dadka faalooda ayaa is hortaagay isagoo qiil uga dhiganaya in mashruucan uu aad isugu hawlayo beelaha laga tirada badan yahay inta ay dhexgali lahaayeen baahida loo qabo hay'adaha adeegyada bixiya si ay u tiigsadaan ugana yeelaan adeegyadooda kuwa gaari kara wadiiqooyin dhaqameed oo xasaasi ah. Iyadoo laga jawaab celinayo faaladaasi ayaa xusid mudan in mashruucan uu qaaday: (1) fursad u tahay beelaha ku nool Toronto si loo fahmo dhaqamadooda kala gedisan si markaasi loo helo adeeg u waangasan iyaga, iyo (2) inuu noqdo qaab saldhig u noqda ee lagu gaari karo in ururrada dhexdooda ay wax ka bartaan. Culayska mashruucan gabi ahaantiis ayaa diiradda saaray waayo aragnimada dadka laga tirada badan yahay ee ku jira hanaanka adeegyada bulshada ee Toronto.

J. Beelaha Soomaalida ee Toronto

Beelaha Soomalida ee Toronto kuma cusba sida loo abaabulo ururada kumana cusba sida loo dhiso isla markaasina adeegsado ururada adeegyada bixiya isla markaasina taakuleeya xubnahooda. Waxaa ka jira Toronto ururo tiradooda ay u badan yihiin oo ay bilaabeen, isku dubarideen, abuureen shakhsiyaad Soomaali ah. Kuwa badan oo ururadaasi ka mid ah ayaa samaystay dalad guud oo ay ku midoobeen oo la yiraahdo Midaynta, oo ku takhasustay adeegyada dejinta dadka Soomaaliyeed. Midaynta ururada xubnaha ka ah waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

- Somali Canadian Association of Etobicoke
- Somali Canadian Counselling Association of Ontario
- Somali Family and Child Skills Development Services.
- Somali and Women's Organization
- Somali Community Centre of Etobicoke
- Ogaden Somali Community Association of Ontario
- Somali Canadian Community of Ontario
- Somali Immigrant Aid Organization
- Somali and Canadian Society of Metro Toronto
- Somali Banadir Association
- North York Somali Immigrant & Culture Support
- Inter-Riverine Somali Relief Association Supporting Group
- Somali Southern Community Association of Ontario
- Somali Canadian Integration Society

Awoodda ururadaasi ay ku abaabuli karaan wax u dhaw naafada ayaa lagu muujiyay shir ku saabsan xanuunka maskaxda gala bishii April 2004tii ee lagu qabtay xarunta deegaanka ee Etobicoke. Shirkaasi ayaa waxa ka soo qayb galay in ka badan 100 qof oo oraahyo ku aadan ka soo jeediyeen dhakhaatiir, shaqaalaha adeegyada bulshada iyo gabadh la dhalatay nin qaba jirada loo yaqaano cudurka Schizophreniyaha. Haweenaydan ayaa waxa dadkii ka soo qayb galay shirkaasi waxa ay u arkayeen in tahay geesiyad, maadaama ay beelaha ay ka soo jeeddo ee Soomalida ah qariyaan xanuunkaasi marka uu ku dhaco in ay ka hadlaan in ay caawimaad waydiistaan iskaba daayee.

Ka qaybgalayaasha shirkan ayaa dreenkooda waxa soo jiidatay korodsiimada xubnaha Soomalida ee doonaya in ay helaan Shatiga lagu qabto hawlaha caafimaadka iyo kuwa maskaxda ee waqooyiga Maraykanka. Xirfadlayda Soomaaliyeed ayaa qaban kara hawlo qiimo ugu fadhiya beesha isla markaasina u noqon kara dhuun laga fidiyo xogta ku saabsan farqiga u dhexeeya Xanuunka Maskaxda iyo Naafada xagga garashada, taasoo loo baahan yahay in lakala saaro si loo abbaaro arimaha khuseeya Naafada garashada ee beesha.

1. Dib-U-Eegidda Qoraalka

Tirada aan rasmiga ee Soomaalida degan magaaladan Toronto ayaa qiyaasteeda si wayn u kala duwan- 40kun ilaa 50 kun (Immen, 2000; Elmi, 1999; McGown, 1999) ilaa iyo 75,000(Israelite et.al, 1999), ilaa iyo 200,000(O'Reilly, 2003). Hayadda Tirakoobta Kanada ayaa tirada Soomaalida Toronto ku sheegatay sanadkii 2001dii, 17380 (oo isagu jira Soomali iyo dad haybtoodi hore Soomali ahaayeen) iyo 16, 105 kun (Asalkoodu Soomali yahay),² taasi oo ah tirada ugu yar oo ay qormo daraasadeedkan ku ogoaatay. Kooxahan Soomalida ah ayaa kala degan dacalada Toronto ee Wadadda Dixon ee aadda garoonka caalamiga Pearson, Xoogaa kale oo degan Regent Park ee faras magaalaha iyo Scarborough ee dhinaca bari magaalada.

Waxa la sheegay in Soomalida ay wadaagaan luqad, dhaqan, diinta islaamka oo isku mid ah (BBC London, 2003), taasina waxa ay muujinaysaa in Soomaalida yihiin dad isku mid ah, Haseyeeshee xubnaha kooxahan ayaa waxa kala saara qabaa'ilo kala duwan oo ay u qaybsan yihiin, (Silveria & Allebeck, 2001) Soomalida ayaa ah dad is dhexgala(Griffiths 200,282), balse ay jirto farqi u dhexeeya Soomalida ka timaada waqooyiga, koonfurta, bartamaha, iyo dhul xeebeedka Somalia iyo Somaliland. Waxa kale oo suuragal ah in ay jiraan luqadaha Soomaliga iyo Af maayga (Also called May-may) marka la barbardhigo afka maxaa tiri. Qaxootiga Virginiya iyo barnaamijka caafimaadka socotada ayaa soo saaray wargays ku qoran labada lahdood inkastoo ay jiraan in qoraalka ay iskaga egyihiin Af May iyo Maxaa Tiri haddana ku hadalka way ku kala gedisan yihinn. Van Lehman & Eno (d/u) ayaa qoray:

Sidii xoriyadda loo qaatay sanadkii 1960kii, ayaa dawladahii Soomaliya waxa ay ku dadaaleen hirgalinta ah in Soomalida ay yihiin dad isku mid ah, sheegashadaasi oo ay ayideen Soomalida reer guuraaga ah ee wax bartay iyo kuwa aan Soomalida ahaynba. Sheekada isku mid ahaanshaha ayaa si aanan jirin loo galiyay Soomalida dhaqankooda reer guuraaga yahay, dad xeeldheerayaal ah qaarkood ayaa ku qiyaasay ilaa iyo seddex dalool oo dalool Soomalida oo dhan ay yihiin dad laga tiro badan yahay, iyagoo kala matalaya dhaqamo kala duwan, luqado, iyo sida loo fasirto diinta islaamiga ah ee mad-habta suniga ee loogu badan yahay.³

Beelaha Soomalida ee wadankan ku cusub ayaa lagu tilmaamaa in ay aad ugu badan yihiin qoyska halka waalid (i.e. single mother), weliba hooyada kaliya ah oo aad ugu badan marka la bar-brdhigo ragga iyadoo ay ugu wacan tahay in rag badan ay ku le'deen dagaaladii sokeeye, iyo ragga oo qaba in ay iska joogaan dalkoodii hooyo markii qoysaskooda ay u qaxeen xeryaha qaxootiga ah markaasina uga sii gudbay Kanada. Kala guurka haweenka Soomalida ee bixinta koreemada ay aad ugu tiirsan tahay ilaa iyo inta ay ka waynaanayaan ayaa sii kordhinaysa culayska kala jajabka iyo safarada tirada badan ee la xidhiidha socotadooda. (Israelite et. al., 1999; Osaki, 1997).

b. La kulanka Ururrada iyo Hya'adaha Adeegyada

² Tixraac: Statistics Canada, 2001, Canadian Census tabulations, Table 97F0010XCB01001

³ Fikrado tan ka duwan ayaa akhristaha ka eegan karaa xubinta IV oo looga doodayo guulaha beelaha Soomalida ee Toronto ay ka gaareen furdaaminta qilaafaadka gudahooda ah kuna guuleystay inay abuuraan heyb Soomaali oo mideysan.

Warar badan oo laga helay ilo ku dhaw dhaw ayaa sheegaya (Israelite et.al. 1999) in Soomalida kala faquuqid xili dheer ah ay la kulmeen tan iyo intii ay u soo guureen Dalkan Kanada. Waxaa kala qoqobkaasi si qayaxan ugu sameeyay milkiilayaasha guryaha iyo loo shaqeeyayaasha, kala qoqob habaysan oo tiirar adag ku taagan ee kaga imanaya sharciga socotada dalkan Kanada. Ayaa jira. Matalan, iyadoo ay jirto waraaqo aqoonsi la'aan baahsan ee muujinaya muwaadinnimda Soomaalida, iyo shuruucda dawladda Kanada, ayaa qaxootiga waxa qasab looga dhigay in ay sugaan muddo 5 sanadood sidii ay u heli lahaayeen warqadda deganaashaha (Landed Immigrant Status). Waqtigaasi ayaa Soomalida waxa aanay awoodi Karin in ay ka dhoofaan Kanada iyagoo aan haysanin damaanad ay wadanka dib ugu soo noqon karaan dalkan, waxa kaloo aanay u fidin Karin damaanad ay ku keeni karaan xubnaha qoyskooda (sponsorship), waxa kaliya ee loo ogolaa ayaa ah in ay qaataan waraaqaha lagu shaqeeyo ee ku meel gaar ah, iyadoo inta badan aanay xaq u lahayn in barnaamijyada ay bixiso Ha'yadda Horumarinta Muruqmaalka Kanada.

Qoraaga ayaa ku macneeyay in dadka Soomalida ah ay ka mid yihiin kuwa loogu maciin daran yahay ee dadka laga tirada badan yahay ee dalkan Kanada. (5) waxaana sabata ugu wayn loo arkaa in ay tahay in xaqiiraad ku salaysan ciladaha ka imanaya shakhsiyaadka Soomalida laftigooda oo aanay ka dhaxayn is dhexgal.

Israeli et. Al ayaa ku tilmaantay in ay jirto baahi sare oo urursan beeshan dhexdeeda marka la bar-bardhigo beelaha kale ee Kanada. Waxaa intaasi dheer, in Soomalida ay dhaqan u leeyihiin in ay afkooda maalaan, dumar fara badan ayaan u baran dhaqanka waraaqaha ee Kanada iyo reer galbeedkuba ay ku can baxeen(20) isu gaynta arrimahaasi ayaa keenaya in dadaal darajo sare gaarsiisan la helo si ay u noqdaan dad la qabsada hanaanka dalkan Kanada..

Opoku-Dapaah (1995, 61) ayaa intaa ku daray in tilmaamahaasi markii uu qorayay “Soomaalida ay jecelyiin in ay iyaga isku koobnaadaan marka ay haasaa-woonayaan ama ay fikrado is waydaarsanyaan iyo meelaha degsiimadooda ku kooban. Kuwa ku jira jaamicada waxa ay ka qayb qaataan hawlaha ka baxsan deriskooda” Silveira iyo Allebeck ayaa ka faalooday guuldaradii Soomalida badmaaxinta ahayd in ay abuuraan Beelo ganacsato ah ama bulsho wayn marka laga eego mudada dheer ay deganaayeen jasaan irka Ingriiska.

Elmi (1999, 9) ayaa ku warbixiyay:

Soomaali aad u badan ayaa ka jeestay in ay adeegyada qaarkoodba jiraan. Adeegyadaasi ayaa dalkoodii hooyo aanay ka jiri-jirin taasi oo dhalisay guud ahaanba in aanay halkan u adeegsan. Xataa haddii ay garawsan yihiin dadkooda in adeegyadaasi ay jiraan waxa laga yaabaa in aanay aqoon halka ay ugu hagaagayaan. Taasi waxa ay keentay kuwa badan oo caawimaad la'aan ku dhacday. Inta badan dadkaasi waxa ay iska xaadiriyaan goobaha adeegyada iyagoo aan balan sii qabsan, iyagoo filanaya in si deg deg ah ku helayaan waxa ay doonayaan. Luqadda oo ku adag iyo qaabka ku xidhan sida loo fulinaya adeegyada ayaa niyadda ka dila dadkaasi qaarkood in aanay isticmaalin adeegyada aan ahayn gargaarka deg-degga ah.

Kooxahan kuwa la taariikh ah ee la mid ah ee Toronto ku sugan, Soomalida ku sugan Boqortooyda Ingriiska, gaar ahaan magaalada London, ayaa noqon karta bartii laga bilaabi lahaa barashada siinta adeegyada ay doonayaan dadkani. Waxa faa'iido u noqonaya taariikhda dheer: Magaalada London ayaa ah hoyga Soomali ku dhalatay dalka Britain(Soomalidii badmaaxintii

ahayd ee ka shaqayn jirtay Maraakiibta dagaalaka iyo kuwa ganacsiga ee dalka Ingriiska) iyo kuwa dhawaanta ku soo barakacay dagaaldii sokeeye. Tiro adeegyadaasi ka mid ah waxa la jaanqaaday koriimada kooxahaasi.

Mid ka mid ah adeeg bixiyayaasha ee Mind (www.mind.org.uk) oo ah tan ugu horaysa sadaqada xanuunka madax gala ee England iyo Wales. Yoolka adeegan ayaa u muuqda mid la mid hya'dda Community Living Toronto waxaana ka mid "turxaamaha kala qoqobka iyo hirgalinta ka mid noqoshada" "Hiyi kaca horumarinta tayada adeegyada ee muujinaya baahida iyo kala duwanaashaha" (Mind, 2003). Ururkan ayaa waxa uu dhidbay maskaxaha kala duwan sidii ay isugu xidhmi lahaayeen si looga jawaabo adeegyada ay u baahan yihiin dadka madawga ah iyo beelaha kale ee laga tirada badan yahay ee ku sugan Britain iyo Wales. Barta internetka ayaa siinaysa xoogaa macluumaad ah sababaha beelaha laga tirada badan yahay ay uga walaacayaan in ay gacan saar la yeeshaan hay'adaha bixiya adeegyada:

- Mid ka mid ah afti la qaaday ayaa muujinaysa , in beelaha laga tirada badan yahay ee u baahan daryeelka cudur maskaxeedka oo laysku halayn karo, ayaa 85% waxa la dhigay cusbitaalda qaybta dadka dhimr beelka qaba.
- Dadka ka yimid beelaha laga tirada badan yahay ayaa wax ay u badan tahay in la siiyo dawooyinka qasba jirka 95% sida ECT ama dawooyin lagu duro inta lagu dawayn lahaa hadal.
- 74% ayaa la siiyaa dad aan badnayn ama wax daawayn ah haba yaraatee.

Diverse Minds ayaa la timid dhawr straatijiyadood si ay u wajahdo dhibaatooyinkaasi, oo ay ku jirto in ay soo saarto qoraalo seddex biloodle ah, barta internetka(Website) toos u abaaraya xaaladaha beelaha laga tirada badan yahay ee qaba xanuunka maskaxda iyo sarkaal xidhiidhiye ah oo si joogta ah u fuliya gacansaarka adeeg bixiyayaasha iyo beelaha su'aalaha ay qabaan.

BBC London ayaa sheegtay in ay kooxdan tahay tan kaliya ee ka jirta magaalada ee qabata adeegga caafimaad ee si toos ah ula shaqaysa beelaha Somalida. Idaacadda waxa kaloo ay ku xustay liiskeeda in Ururka Bariga London ee Soomalida (East London Somali Consortium), Ururka beesha Soomalida Lambeth (Lambeth Somali Community Association) (la talinta laanta socdaalka iyo gargaarka arrimaha sharciga), Ururka Daryeelka iyo Waxbarashada Soomaaliyeed (The Somali Caring and Education Association) iyo kuwa kale.

Beelaha Soomaaliyeed ee deggan Boqortooyada Ingriiska iyo beelaha Bengoolka ayaa waxa ay Bell et.al ku tilmaantay (1999) inay tiigsadaan, culays - waynna ku qabaan adeeg bixiyaha caafimaadka marka la bar-bardhigo kooxaha kale ee laga tirada badan yahay, sida dadka ku hadla Urduuga iyo Gujuraatiga. Waxaa uu dhowr sababood u yeelay culayskan in uu keenay:

- Waxaa aad u yar tarjumada qoraalada ee beelaha (sida luqadda Soomaliga).
- Daraasad lagu sameeyay kala saaridda cudurka Kansarka ee gala naasaha "hal qof oo kaliya ayaa 32 haween Soomaaliyeed ah lagu martigaliyay ka qaybgalka kala saaridda kadib markii ay heshay martiqaadkaasi. Beesha Soomaalida ee ku xidhan dadka ku shaqada leh ayaa booqday kuwa aanan ka qayb galin waxayna ku warbixiyeen in aanay awoodi Karin akhrinta Soomaliga iyo Ingriiska. Arrintani waxa la qaba tiro aan qiyaas lahayn iyo xubnaha

qoyskooda. Qoraalka farta Soomaliga ayaa la qoray muddo haatan laga joogo soddon sanadood, intii ka horaysay waxa ay luqadan ahayd mid afka looga hadlo oo qura. Waxa ay ahayd sanadkii 1975kii in Soomaliga qoraalkiisu uu dhaqan gal baaha noqdoay. Ka haween ahaan ee lagu martiqaaday kala saaridda naasaha qaba cudurka ayaa waxa ay da'deedu ka yarayn 50 sanadood, waxa ay ahaan lahayd fursad yar in ay akhrin karaan luqadooda. 31ka kale ee haweenka Soomalida oo ay soo booqatay shaqaale isku xidhka, 7 (23%) ayaanan jeclaysan in ay ka qayb galaan qadiyadan oo ay dibadda ka joogaan, iyo 12 (41%) haweenkaasi oo goor-dambe ka soo qayb galay” (Bell et.al.'1999)

- Bell et.al ayaa ogaatay in haweenka Soomaaliyeed iyo qoysaskooda ay qadarin gaar ah u hayaan dhaqaatiirta. Waxaana si guud ay u qadariyaan dhakhtar oo dhan noocuu doonaba ha ahaadee, waxa ay ina tusaysaa in tageero xoog leh ay u noqonayso hay'adaha bixiya adeegyada haddii uu ayidaad ka helaan dhakhaatiirta.
- Baaritaankan ayaa tusmeenaya in beesha Soomalida ay ka samaysan-tahay qayb gaar ahaaneed oo qabta dhib u gaar ah, waxa ay u baahan yihiin fiiro gaar ah ee shakhsiyadeed
- “Baaritaankeena ayaa muujinaya in baeelaha Soomalida ay ka kooban yihiin qaybo gaar ahaaneed ee qaba dhibaatooyin u gaar ah; waxa ay u baahan yihiin fiiro shakhsiyadeed iyo dhiiragalin ay ka helaan dadka qaarkii oo fahmaya arimahooda ayna aamini karaan. Dhexgalka iyo ka qayb galid fir-fircoon oo si isku xidhnaan ah xubnaha beelaha ayaa faa'iido u noqonaya stratiijiyada qorshaynta iyo dhaqan galinta ka hortagaidaha ah” (Bell et.al; 1999)
- Naafanimada ayaa aad ugu yar duqayda Soomaaliyeed, inkastoo fikradda ah naafanimada sida uu inoo sheegay turjumaankeena ay ka rumaysan yihiin Soomaalida daciifnimo niyadda ah ama aaminka ilaah lagu qabo oo meesha ka maqan ay horseeday in aanay soo sheegan ciladaha ay qabaan.(Silveira & Ebrahim, 1998, 381). Natijada dhabta ah, 93% ka qaybgalayaasha baaritaankan oo ay da'dooda ka wayn tahay 70 jir ayaanan sheegan in ay qabaan curyaanimo dhinaca jirka ah marka laga eego hawl maalmeedkooda-taasi oo taageeraysa malahii ahaa naafanimada iyo xanuunka in uu dhaqankooda ka yahay mid aan la sheegan. Xataa ka qaybgalayaashii qabay dhibaatooyin xanuun ragaadiyay ayaa muujiyay in aanay qabin naafanimada.
- Hal hayska udub dhexaadka ah ayaa ahaa fakirka oranaya caafimaadka iyo geeridu dhamidood waa quwad rabaani ah oo go'aanka kama dambaysta ah uu qaadanayo ilaahay. Fasiraadda diimeed ee naafanimada mid loo dhawaaqay noqashadeeda fursaddana ay tahay mid meesha ku jirta inkastoo-natijada caafimaad iyo dherarkeeda ayaa loo arkaa mid ku xidhan sida ay u dhaqmaan unugyada asalka ah(sida ay qabaan aqoonyahanada)(Silveira & Allebeck, 2001,314).

Uma eka in layku duubo diidmada in ay adeegsadaan adeegyada caafimaad iyo bulsho, ugu yaraan duqayda Soomaaliyeed sida ay sheegayso daraasadda Silveira & Allebeck (2001). Mawduucyada caafimaad ayaa u muuqda in lala tashaday xiliyadii dhawaa ee la soo dhaafay, iyadoo kuwa luqadda yaqaana ay aad ugu dhawdahay in ay ka heleen la tashigaasi mid ay ku qanacsan yihiin.

Helidda xaqiiqdan ayaa qayb ahaan lagu koobi karaa soomalida oo dhan Silveira & Allebeck(2001) ayaa heshay isku xidhka diimaha iyo aqablaadda mushkiladda nololaha. Caqiidada diinta ayaa laga yaabaa in ay ka horjoogto dadka u fahmay in mawduuca naafanimada ay tahay karaahiyo, sheegashada waxyaabaha muujinaya walaaca iyo buufiska, waxayna u arkaan calaamad ka tagista aaminka lagu qabo ilaah ama daciifnimo.(316). Aqablaadda naafanimada ayaa waxa hortaagan cabsi ciqaab rabaani ah in ay ku dhaco daciifnimadooda awgeed. Nin ayaa ka muujiyay sida aanay raali ugu aheen oo sheegay “qof aanan lahayn niyad bir ah oo ay diintiisu daciif tahay, oo aanan maarayn karin dhibkaasi la soo darsay, Anigu ma ahi buu yiri shakhsi noocaasi ah ...kama aan hadli karo...mana aan filayn su'aal noocaani oo kale ah, waxaan u malaynayay waxyaabo kale in aad ka hadlaysaan. (Xigasho Silveira & Allebeck, 2001, 317).

Silveira & Allebeck ayaa xustay koox la yaab leh ee isu haysata in ay isku filan yihiin sidaasi danted ku hawlan adeeg heer hoose ah, laakinse dhabtii u baahan dhexgal balaaran oo ay ka helaan wadanka ay martida u yihiin. Aragtida gaaban ayaa la saadaalin karaa mid aan caafimaad qabin marka laga eego koox ku cusub wadan oo kala kulmaya dhibaatooyin shakhsiyeed iyo mid kooxeedba kala soo kulmay dagaaladii sokeeye ee ku dhaliyay in ay soo qaxaan, iyadoo xagga qorista iyo akhriska markii ay joogeen dalalkoodii iyo kan ay hadda soo degeenba luqadda looga hadlo ay darajadoodu hoosesay, waxayna u muuqataa in ay tahay tan keentay takooridda ay kala kulmayaan xagga shaqada oo ah arrin beelaha dadka madaw ee Toronto oo dhan haysata(Fiiri mathalka, Khadka-kulul ee laanta socotada Kanada, 1993; CBC news, 2003; Carey, d/u; Wilkes, d/u).

Nasiib daro, daraasadda ay samaysay Hay'adda Silveira & Allebeck's ayaa waxa ay ku koobnayd oo kaliya duqayda raga Soomaaliyeed oo aan ku soo bara kicin dagaaladii sokeeye. Daraasad dhawaanta laga sameeyay Toronto wallow aan lagu eegin fakirka marka loo fiiriyo dhibaatooyinka caafimaad ee xanuunka maskaxda gala ee ku dhaca qaxootiga iyo socotada cusub ee magaaladan Toronto. Elmi(1999, 2) ayaa daabacday in “is dilka iyo xanuunadda waawayn ee maskaxda gala ku dhicitaankiisa oo ku soo badanaya Soomalida ku nool magaaladan Toronto ayaa keentay walaac ay ka muujiyeen shakhsiyaadka iyo qoysaska intaba” fikradan ayaa ka soo ifbaxday waraysiyo ay baaritaankan ku sameesay.

Griffiths (2000) ayaa iyana qaaday daraasad ay ku samaysay beelaha Soomalida iyo Kurdiska qaxootiga ku jooga Magaalada London taasi oo muujinaysa sida ay labada beel u kala duwan yihiin-Kuwa awoodi kara in ay sameeyaan waji dadwayne iyo “cod wadaag” kuwaasi oo la macaamili kara iyagoo aan ku xidhnayn koox dhaqameed(oo ay ku jirto maamulada dawladda iyo kooxaha adeegga) iyo kuwa aanan ahayn noocaasi. Dhinaca kale beelaha Kurdiyiinta (oo aad moodo in tayo ahaan la mid yihiin beelaha Taamiilka) ayaa awooday in ay arrintaasi sameeyaan, Beelaha Soomaalida ayaa lagu tilmaamaa “in in aanay muuqan isla markaasina ay ka maqan tahay wax lagu tilmaami karo siyaasad urursan ama bulsho wadajira” (284). Markii dambe ayuu hadalka si kale u dhigay isagoo culayska saaraya: Baaritaanka, in ururo kala jajaban iyo kuwa aan macno ku fadhin, bulsho gaar u baxday iyo maqanaashaha mashruuc siyaasadeed oo isku xidhan ayaa astaan u taagan ah qaabka Soomalida ee ku sugan Bariga London” (294). Sida nin Soomaaliyeed uu sheegay markii ay ka yimaadeen dalka Soomaaliya oo sheegay in ay goob jog ka ahaayeen dagaalo badan, iyo dad dhintay. Markasta waa in aad taqaanaa sida loo dagaalamo. Ma naqaano sida inta loo wada fadhiisto dabeedna midba midka kale ula hadlo, sidaasi daraadeed marka ay

arkaan ururo beeledyo, waxa ay dhaar ku marayaan in ay nafci ka helayaan... ma fahamsana in ay tahay urur mutadawacinmo ku shaqeynaya” (288).

Isku soo wada duuboo-kala jajabka iyo is ururin la'aanta oo ay weheliso aqoon xumi ee deegaanka bulsho wadanka ay martida u yihiin-ayaa ka horjoogsanaya shakhsiyaadka Soomaaliyeed in ay tiigsadaan adeegyada ay u baahan yihiin xataa haddii ay baahi wayn u qabaan. Xaaladda ayaa u muuqata mid la mid ah xaalad haysata shakhsi naafo ka ah caqliga ka hor inta aan waalidka ishabayntiisu bilaaban samaynteeda, ama Ameerikaanka madow in ay degaan koonfurta Maraykanka sidii ay ahaayeen ka hor inta la samayn xuduntii dhaqdhadhaqaaii xuquuqda rayidka. Qodobkan oo ay u baahan yihiin beelaha in ay isku abaabulaan ka hor inta aanay bilaabin in ay la macaamilaan kooxaha jira iyo adeegyada ay bixiyaan.

Marka laysku wada duubo xirfad la'aanta xagga luqadda Englishka, is aaminaad darada kooxaha dhexdooda, cabsida kala soocidda, iyo ka madhnaanta aqoonta aas-aasiga ah ee hanaanka adeegyada ayaa si xoog leh sare ugu qaadaysa caqabadaha ku gudban in ay la macaamilaan hay'adaha sida Community Living Toronto.

t. Dabeecadda Soomaalida iyo Meesha uu u Janjeerto Aragtidooda xaaga Nafada

Inkastoo aan xog badan laga hayn dabeecadda iyo meesha ay u janjeerto aragtida dadka ka qabaan naafada maskaxeed, haddana Soomaalida ayay meheradooda tahay caafimaadka in ay ilaa xad ka qabaan fikrado ay ka dhaxleen xagga dhaqanka oo ku aadan sababaha cudurka keena iyo sida loo daweyn kara. Waxaa suuragal ah, in ka hor inta aan qofka bukaanka ah dhaqaatiirta la tusin, in qofka marka ugu horaysaba qofka xanuunka maskaxda qaba in lala tiigsado dawooyin-dhaqameedka. Elmi (1999) iyo Silveira & Allebeck (2001) waxey qoreen in dadku ay aaminsan yihiin ”in jiradu iyo ka reysashadeedaba ay tahay mid ku xiran rabitaanka Ilaahey” (Elmi, 1999, 5). Elmi wuxuu kale uu qoray in marka xagga dhaqanka laga eego ay dadku qabaan in qofka uu ama fiyoow yahay ama uu jiran yahay, oo aanu jirin wax labadaas u dhexeeyo, sidaas darteed “ Qofku waa inuu jiradu u oggolaadaa una wajahaa si adkeysii iyo sharaf leh. Wuxuu kaloo qoray ” in haddii qofka uu si sharaf iyo hal adeegnimo ah ugu adkeysto xanuunka in dadku u fasirtaan in Qofkaasi uu Ilaahey u dembi dhaafayo.”

Soomaalida waxey ka sokow u nisbeynta jirooyinka iyo / ama faya-dhowrka jireed iyo maskaxeed iney ka timid xagga Ilaahey, waxey kaloo sababaha caafimaad xumada u nisbeeyaan inkaar, ruuxaan (spirit), ama “IL” (Evil Eye) jiradaas oo loo nisbeeyo sixirka (Elmi, 5).

Soomaalida waxey kaloo istacmaalaan waxa loo yaqaan dawo-Soomaali (traditional medicine), siiba marka ay beelahu u arkaan in arrinta la daweynayo ama la sanceynayo ay leedahay xasaasiyad-dhaqameed (taboo) oo gaar ah, ayna damacsan yihiin iney ka gaabsadaan ama ka kaaftoomaan hey'adaha adeegga caafimaadka. Dawo-Soomaaliga (traditional medicine) waxaa ka mid ah qofka oo Qur'aan lagu akhriyo ama lagu dhayo caleemo la shiiday, iyadoo meelha qofka xanuuneysa lagu gubo musmaar la-dabeeyay, qofka oo xoolo loo qalo ama la uumiyo, iyo ayadoo qofka loo gooyo xersi (amulet) (Elmi, 1999, 5).

2. Wareysiyada iyo Doodo-kooxeedyada Beelaha Soomaalida

Iskudabaridka kullanaada Beelaha Soomaalida waxey ahaayeen kuwa ugu dhib badan. Waloow ay Soomaalida lala kulmay ay si wanaagsan usoo dhoweeyeen wakiilada Community Living Toronto iyo Roehrer Institute, haddana si bey u adkeyd in shaqsiyaadka Soomaalida iyo shaqaalaha ururrada beelaha Soomaalidaba in lagu dhiirigeliyo iney dood-kooxeed (focus groups) isugu yimaadaan.

Waxaan wareysi isdabajoog ah lagula yeeshay xafiiska Dejinta Beesha (Toronto Somali Service) saddex hooyo iyo hal aabe oo qabaan caruur naafo ah. Ka qeybgalayaashu waxey yimadeen saacdo kala duwan ee maalinnimada. Waxaa dad badan dareemeen in sida Soomaalida ay u fahmaan waqtiga ballanada ay aad uga duwan tahay ballannada Reer Galbeedka.

Waxaa ka qeybgalayaasha la weydiiyay su'aalo hore loo soo diyaarshay Af Soomaali ku turjumay shaqaale Soomaali ah u la shaqeeya hey'adda Developmental Services Worker Program ee Centennial College. Shaqaalaha wuxuu kaloo turjumay isla jawaabaha ay su'aalaha ka bixisay Aamina oo aheyd ka qeybgalahii ugu horeeyay.⁴

Ka qeybgalayaasha waxaa ka mid aheyd Aamina oo ah hooyo u keliyeysatay korinta shan caruur ah. Gabar caruurteeda ka mid ah oo 10 jir ah waxay qabtaa jirada loo yaqaan "Cerebral Palsy," waxaana hooyadu timaantay iney si joogto ah u qeyliso. Aamino waxey ku nooshahay guri yar, ma shaqeyso, waxaana daqli u ah gargaarka la siiyo dadka ceyrta ah.

Aamina waxey gargaar ka heshaa xarunta dhexe ee caruurta, halkaasoo laga siiyo dawooyin ka mid ah cirbado u suurtagelineyso iney dhaqaajiso murqaha jirkeeda. Waxaa kaloo, gabadha xanuunsan xagga skuulka ka heeshaa leylinta hadalka (speech therapy). Aamina hore uma maqlin jiritaanka hey'adda Community Living Toronto umana suuragelin iney istacmaasho adeegga ay fidiso.

Aamina waxey ku warbixisay in gbadhu u baahan tahay barnaamij madadaalo ah (recreational program) iyo mid iyada lafteeda u baahantahay wax u suurageliya waqti ay kaga nasato gargaaridda joogtada ah ee gabadheeda. Waxey kaloo muujisay iney jeclaan laheyd in gabadheeda la geliyo fassalada caadiga ah, laakinse ayan garaneyn sidii arrintaas ku suurageli laheyd. Waxey weydiisay sidii arrintaas ku suurageli laheyd una heli laheyd ciddii ka gargaari laheyd, maadaama iyada ayan ku hadleen Afka Ingriisiga.

Inkastoo Aamino ay ka mahad sheeganeysay xarunta dhexe ee caruurta, haseyeeshee waxey tilmaantay iney jiraan in dhawr jeer oo ay hey'adaha dowladda ka ballan qaadeen iney guriga uga iman doonaan si' ay u siiyaan gargaarka ay u baahan tahay, laakinse ayan iman; ama marar uu qof shaqaale ah oo ka tirsan hey'adaha adeegga u ballan qaaday inuu usoo diri doono waraaqo, laakinse uusan oofin ballankiisa.

Mar Aamino laga wareystay sida ay gacan uga hesho saaxibada, qaraabada iyo deriska, waxey tiri, waxaa suuragal ah iney ku siiyaan lacag aad taxiga ku racdo, ama ay baabuur kugu qaadan

⁴ Si loo sugo qarsoodida magacyada ka qeybgalayaasha ayaa waxaa la gatay in la beddelo magacyada shaqsiyaadka oo dhan.

karto marka aad ballanka leedahay, mase suurowdo iney kula qeybsadaan shaqada gargaaridda qofka bukaanka ah.

Waalidka labaad oo la wareystay wuxuu ahaa Asad oo dhalay will 8 jir ah oo qaba cudurka la yiraahdo “Down Syndrome,” taasoo ay kala kulmaan dhibaatooyin badan. Wuxuu gargaar ka helaa Wasaaradda Adeegga Beesha oo ay ku siiso boqolaalo doolar bishiiba.

Asad wiilkiisa wuxuu dugsi dhexe ka dhigtaa bariga Toronto. 2003da iskuulkaas wuxuu lahaa lix barnaamij oo waxbarashada gaarka ah (special education) (TDSB, 2003), laakinse ma ay cadeynin in wiilka Asad uu ka mid ahaa ardayda sida joogtada ah ama sida buuxada uga geybgala barnaamijka ama inuu nus-galin uu ka dhigan jiray. Muddada wareysiga lala yeeshay qoyska, waxey dalkan joogeen 13 bilood, inkastoo kalkaaliye caafimaad oo ay siiso leylinta hadalka (speech therapy) ay guriga ugu tegi jirtay, haseyeeshee waxaa la sheegay in aysan si buuxda u heli jirin gargaarka ay u baahnaayeen. Wiilka Asad aad ayuu u jiran yahay, sidaas darteed si joogto ah ayey u tagaan cisbitaalka. Wuxuu qabaa jirooyin diiday dawooyinka kala duwan ee uu qaato, sidaas awgeed, habeenimada si buuxda uma seexan karo.

Waxyaabaha uu Asad gocdo ama dhaliilo waxaa ka mid ah amaanka wiilkiisa, maadaama wiilka uusan dareensaneyn halista. Wuxuu siiba dhaliil-san yahay halista dabaqa 6aad oo uu deggan yahay oo uga baqo in wiilka uu si kedis ah uga boodo. Maamulka guriga uu deggan yahay kama oggolaan codsiyiisa ku aadanaa in la siiyo dabaq hoose. Sidoo kale wiilka uma kala soocna halista la xiriirta waxa uu cunayo. Mushkilo kale waxa ay ka heysataa xagga baska iskuulka maadaama uu la koro caruur kale.

Marka wakiil ka socda Community Living Toronto (CLT) uu Asad wax ka weydiiyay iskuulka, wuxuu yiri maamulaha skuulka waa qof wanaagsan, Asad ma rabin inuu ka cawdo, mase garaneyn waxyaabaha u baahan yahay oo laga haqab tiri karo.

Asad iyo aaminaba waxey gacan ka helaan urur ka tirsan ururada adeegga ee Soomaalida.

Xabiibo waxey dhashay wiil 16 jir ah oo maskaxda naafo ka ah. Inkastoo iskuul ku jira, haseyeeshee, kartidiisa akhrinta, qorista, iyo xisaabintaba aad ayey u hooseysaa. Wiilku wax saaxiibo ah kuma laha deriska. Xabiibo waxey sheegtay in wiilka uu u baahan yahay saaxiibo iyo barnaamijyo dibad-bax ah oo uu ku madadaasho. Sidoo kale, waxey sheegtay inuu u baahan yahay cid u meerisa daruusta iskuulka.

Habiibo waxey qabtaa todoba caruur oo 16 jir ugu weynyahay. Inkastoo uu ka qeybgalo barnaamijka Co-Op ee iskuulku u diray, si iska-wax-u-qabsona u shaqeeyo, haseyeeshee inta badan cidna xiriir lama laha oo dadka wuu ka oodan yahay. Habiibo waxey dhowaan kasoo ogaatay dugsiga uu dhigto inay jirto gunnad dhan \$ 225 oo Wasaaradda Howlaha Adeegga Beesha ay bixiso.

Iimaan waa hooyo u keli ah koriinka caruuta waxeyna qabtaa lix caruur oo kala ah 3 jir, 6 jir iyo 15 jir oo kulligood dhegaha ka naafo ah. Waxaa mushkilo weyn ku noqotay sidii gabadheeda weyn u geyn laheyd iskuulka maadaama baska aan loo oggoleyn, waxaadna moodaa in iskuulku uusan wax gacan ka siineyn arrintaasi. Iskuulka waxaa wada dhigta dad dhegaha naafo ka ah iyo kuwo fiyowba. Waxaa la sheegay in gabadheeda ay xagga waxbarashada ay ka dambeyso kuwa iyada la da’ a ah.

Iimaan waxey ka hadashay baahida ay u qabto in caruurta wax loo meeriyo, maadaama ay iyada ayan wax gacan ah ka siin Karin maadaama ay lafteeda ay iskuulku kaga tagtay fasalka 8aad. Iimaan iskama bixi kartoo kharashka adeegyada ay u baahan tahay, waxeyna ku jirtaa liiska dadka sugaya iney ka helaan adeeg sharikadaha gargaarka ee madaxbanaan (private service organization).

3. Waraysi ay la yeelatay Adeeg bixiya-yaasha Soomalida

Inkastoo aan qorsheenay dadka aan kula kulanay tiro hay'adaha bixiya adeegyada iyo taakulaynta ee Beesha Soomaaliyeed ee Toronto, mar kale waxaan dhib kala kulannay in aan soo jiidano ka qayb galayaal tiro badan. Kooxdan hore loo sii qorsheeyay ee aan la kulanay ayaa qaatay foom ay ku qorantahay waraysiyo loogu tala galay koox, oo aynu kawada munaaqishoonay mowduucyo ay ka qayb galeen dhawr xubno fir-fircoon ee beelaha Soomaaliyeed.

A. la Kulanka Beelaha Ururada iyo Hay'adaha Adeegga

Marka aynu ka hadlayno shakhsiyaadka Soomaaliyeed macaamilka ay la leeyihiin hay'adaha aan Soomaalida ahayn, mawduucyada ay dawladda iska fogaynayso ee xasaasiga ah ayaa u muuqda kuwa la xusi doono, mawduucaasi oo aan kali ku ahayn beelaha Soomaalida dhexdeeda . Socotada sharci darada ah, dadka uu u socdo dhamystirka ay ku codsanayaan qaxootinimada, iyo dadka qaata gargaarka dawladda (Caydha) ayaa rabi lahaayeen in aanay muuqan, oo halka ugu hooseysa ka galaan ishu qabatayga. Tan ayaa ku sii kordhinaysa in ay u janjeeraan aamin darada ay ku qabaan dawladda oo koriimadooda raad hore ugu reebtay in dawladdu tahay musuq-maasuq iyo awood sheegasho dalkoodii hooyo. Soomaliya ma aanay yeelan Dawlad muddo 14 sano ah, waxaana tixgalin mudan in la siiyo fahamka ay Soomalida ka qabaan dawladdnimada iyo waxa ay qabato. “Socotada Soomalida ayaa caqabado badan kala kulmay in ay tiigsadaan hanaanka adeegyada Kanada waayo Soomalida ayaa waxa ay ka cabsadaan dawladda., Hayadha dawladda, iyo qaab dhismeed sareeya ee hanaanka bulshada” (Somali Immigrant Aid Association, du).

Dadka waraysiga lala yeeshay ayaa xusay in uu jiro jahwareer sida hay'adaha adeegyada ay ugu xidhin yihiin dawladda. Haddii uu jiro aragti in xogta ay safarto, marka aan ka hadalno, in ay jiri karaan shakhsiyaad aan doonayn in ay tiigsadaan urur aan la aqoon ee bixinaya adeegyada. Hay'adaha qaarkood oo baaritaankan lagu waraystay ayaa si cad ugu sheegay macaamiishooda in aan xogtooda loo gudbin doonin dawladda.

b. Aragtida Caqliga Naafada ah

Marka aynu ka hadlayno caqliga naafada ah oo ay khusayso shakhsi fir ku leh Soomalia, waxaa durbadii arkaysaa iyadoo aan lagu guuldaraysan in mid ka mid ah mushkiladaha ugu badan ay ka imanayaan raadka ay ku reebtay culayskii baqdinta, buufinta iyo walaaca ee la xidhiidha dhibaatooyinka caafimaadka xanuunka maskaxda gala oo ku badan socotada dhawaanta yimid. Waxaa cadaan ah in arrintan si guud ugu liicaysa jahwareerka ka dhashay in laysku khaldo caqliga naafada ah iyo Xanuunka maskaxda gala.

Addeg bixiyayaasha Soomaliyeed ee ka qaybgalay baaritaankan ayaa si xiiso leh ku bilaabay baaritaanka mashruucan ku saabsan. Shan daqiiqo oo kliya hadaladii na dhexmaray kadib, ayaa cadaatay in aynu ka had-laynay arrimo kala duwan: iyadoo hay'adda iyo wakiilada CLT ka hadlayeen caqliga naafada ah, iyadoo wakiilada beesha Soomaalidana ay ka hadlayeen xanuunka maskaxda gala.

Markii ay caddaatay xaqiiqda arrinkaasi, ayaa dadkii la waraysanayay ayaa waydiiyay macnaha erayga “Caqliga Naafada” ama wax la mid ahaa hmmm.. haa, waxaan u malaynayaa in aan garanayo shakhsi sidaasi oo kale ah” ama, haa, waxaa jiray dad sidaasi oo kale ah oo meel aan iga fogayn deganaa, laakiin garan mayo in ay wali halkii joogaan.

Wada sheekaysigan ayaa ahaa mid wax tar leh marka uu qof walba si isku mid ah uga qayb galay. Mathalan, waxaa la yiri ilmo qaba naafo in loo tixgaliyo jiro oo aanay jirin farqi wayn noocyada xanuunka/jirada/naafada iwm. Mid ka mid ahaa dadkii la waraystay ayaa ahaa dhakhtar tababar ku soo qaatay dalka Romaniya(waxaa caado ah in Soomalida ay tababar ku soo qaataan dalka Talyaaniga) oo xusay in shakhsiga qaba calaamadaha cadaadiska culayska baqadinta kadib, ama buufiska, ama walaaca, ay suurta gal tahay in ay dhakhtarkooda u sheegaan in “waxaan dareemayaa xanuun meel walba taabatay” Waxaana laga yaabaa in uu jiro garasho ah in xanuunka uu ka imanayo maskaxda ee aanu oogadiisa waxba qabin.

Xaaladda ayaa sii xumeenayso markii dhibaatooyinkaasi loo nisbeeyay “Qoorta dusheeda” oo lahjadda eraygaasi uu muujinayo in mushkiladda ay tahay”Waali” waxaa kaloo jira macno kale oo la mid ah, waxaana erayadaasi iyadoo aan lakala soocin loo isticmaalo dadka qaba naafada caqliga iyo xanuunka maskaxda gala.

Dadkii la waraystay ayaa waxa kaloo ay ka hadleen magacyo dhaqameedka ay dadka ugu yeeraan_ il laawe, lugeey, iwm. Wallow magacyada aanay ahayn macnaha bahdilidda ah ay xambaarsan yihiin la macno ah (waxa ay u muuqataa kaftan) shakhsiga ay jirkiisa ka muuqato calaamad ayaa noqota mid loogu magac daro. Baaritaan kale oo dheeri ah ayaa loo baahan yahay in la ogaado sida magacyadan ay xidhiidh ula leeyihiin dhaqanka caadiga, lakiin waxaa loo qaadan karaa xusidan kala duwanaashahan in ay hoosta ka xariiqayso in qofka noocaasi ah uu aad uga fog yahay qof kaamil ah.

Caqliga naafada ah iyo Xanuunka maskaxda gala ayaa lagu kala sooci karaa in kama dambaysta ay tahay mid kala guur ah. Rajada ah in daawo loo helo cudurka maskaxda gala ayaa laba xaaladood u kala qaybinaya. Bil xaqiiqa xanuunka maskaxda gala ayaa ku lamaanan dagaaladii sokeeye iyo qaxii ay muujinaya suurtagalnimada sidii looga hortagi lahaa xaaladaha loo nisbeeyay. Caqliga naafada ah ayaan si wanaagsan loo fahmin, loona faafin, sidaasi darted ay yartahay in laga baxsado nisbayn la xidhiidha xaladooda “Qorta dusheeda”.

4. *Waraysiyo lala yeeshay adeeg bixiyayaasha Soomaaliyeed*

Waraysi kale oo gaar oo aan la yeelanay wakiilada laba hay'adood ee bixiya adeega Soomalida, ayaa ka soo baxay luuqad la mid waraysiga aad ku maqasheen ee aan kor ku soo xusnay. Luuqadda koowaad ayaa waxa ay ahayd jahwareerka ku saabsan farqiga caqliga naafada ah iyo midda kale ah moduuca "qoorta dusheeda". Shantii daqiiqo ee ugu horaysay waraysiga labaad, koox ka kooban afar qof (laba waraysanaysa iyo laba la waraysanayo) ayaa isla gorfeeyay in caruur badan oo Soomaliyeed la dhigay fasalada waxbarasho ee ardayda gaarka ah, inkastoo aanay waxba qabin, taasna waxa ay ku dhacdaa sida qaalibka ah caruurta iyo dhalinyarada dhawaanta yimid dalkan Kanada, kuwaasi oo ay u badan tahay in fasalo gaar ah la fadhiisiyo.

Markii kooxda ay xaqiiqsadeen in aysan ka hadlayn shakhsiyaad qaba caqliga naafada ah, ayaa waxa aan waydiinay caruurta iyo dhalinta qaba wax xoogaa barashada, ama caqliga dhiman qaba. Xogaa ayay aamuseen, dabeedna ogolaadeen in hay'adda ay ka war hayso shakhsiyaad aan badnayn ama qoys. Waxa kaloo aan u qaadnay in, marka aad eegto beelaha Soomaliyeed ee dhawaanta yimid Toronto, shakhsiyaadkaasi in dib looga celin lahaa xuduudaha, mana jirteen in caruurta Soomaaliyeed ee halkan ku dhasha ee qaba naafada ayba dhalan lahaayeen hadii markii hore la celin lahaa.⁵

Waxaa la xusay in shakhsiyaadka iyo qoysaska in hadii Cusbitaalda si toos ah ay u wajahi lahaayeen waxa ay tabanayaan iyo baahidooda inta hay'adha Soomalida oo shaqada ay yaqaanaan ay tahay arimaha la xidhiidha socotada iyo qaadashada jinsiyadda. Waxa kaloo jira baqdin ay hay'adha Soomaliyeed la qabaan dadka Soomaliyeed oo ah in ay la hardamayaan sumcad xumi suuqa u gashay iyo la ogolaado.

Markii aan waydiinay sida ay beelaha soomaalida u arkaan caqliga naafada ah, nisbayn baahsan ee ku lifaaqan jirooyinka, tabaryarida iyo farqiga jira ayaa meesha laga xusay. Waxa kaloo jira nisbayn la xidhiidha cudurka Tii-bishada ama bil xaqiiqa cudur kasta marka laga reebo dhaawacyada ka soo gaara dagaalda sokeeye oo ay kuu tusayaan in uu yahay mid geesi nimo ah. Sida aan kor ku sheegnay, caqliga naafada ayaa la qotomiyay makaanka jiradan, waxaa la sheegay in ay jiraan "kuwa badan oo reeban"

Laga yaabee, oraahdii ugu dhago raaricin fiicnayd ayaa waxa isticmaalay shakhsigii aan waraysanayay waxuuna farta ku goday mawduucyada hortaagan beelaha Soomaalida Kanada- oo xubnaheeda ay haatan la tacaalyaan isrogragga iyo kala firirka xubnaha qoysaska ku dhacay, guryahoodii iyo hantidoodii oo baaba'ay isla markaasina u soo haajiray dhaqan iyo cimilo, dhibaatooyin looga takooray shaqo helidda, midab kala sooc guud ahaaneed, iyo dhibaatooyin ka soo food saaray xagga dagaaladii sokeeye kadib, iyo ariimo la xidhiidha cudurada maskaxda ayaa ahaa " marka ay jiraan 50 arimood oo mid walba midka kale ka mudan yahay, marka aad doonayso dhamaantood in aad qabato, waxba qaban maysid".

IV. Talooyin

⁵ Waxaa dhowaan maqalnay fekrad arrintaasi kasoo horjeeda oo oraneysa in Nawaaxiga Toronto Weyne (NTW) ay qiyaastii joogaan illaa 60 qoys oo Soomaali ah oo qaba caruur naafo ah. Tiradaasi ma ah mid sugan.

Ka qeybagalayaasha daraasadda waxey soo jeediyeen talooyin faro badan oo hey'adaha adeegga ee Kanada si weyn u garan karaan sida loola macaamili karo beelahooda. Xogtaas waxey ku saabsan yihiin talooyin la xiriira dhinaca waxbarashada, iyo is-aaminiddaba, waxaana ka mid ah qodobbada soo socda:

1. In la sameeyo wargeliye (flyers) lagu tarjumay luqado kala duwan (Mandarin, Cantonese, Tamil, iyo Somali) oo lagu micneynayo ururka iyo nooca adeegyada uu bixiyo. Si' sida ugu haboon loo diyaarinayo wargeliyayaashu, waa in lala tashadaa ururrada beelha adeegga loo fidinayo, dabadeena waa in marka hore waxtarkooda lagu tijaabiya beesha ay quseyso qeyb ka mid ah.
2. In la sameeyo wargeliye (flyers) lagu sharraxayo naafanimada maskaxeed, nafaqada dadka qaarkii u baahan yihiin oo lagu micneynayo waxyaabo ka mid ah kuwa lagu xusay warbixinta. Mathalan, wargeliyaha (flyers) Af-soomaaliga ku qoran waa in si gaar ah loogu sharraxaa tafriiqa ku jira jirooyinka-maskaxeed (mental health) iyo naafanimada-maskaxeed (intellectual disability). Sidoo kale waa in si kooban loogu sharraxaa waxyaabaha keena dhibaatooyinkaas. Sidoo kale waa in lagu tilmaamaa qodobbada malo-awaalka ah (myths) oo laga dhaxlay xagga dhaqanka. Ururka Caafimaadka Maskaxeed ee Kanada ayaa arrimahan ka sameysay dhowr qoraalo oo laga shidaal qaadan karo.⁶
3. In xiriir joogto ah lala yeesho ururada bulsho ee beelo-dhaqameedyada kala duwan iyo shaqaalaha ku howlan dejinta beesha oo daneynaaya arrimaha naafanimada-maskaxeed iyo in la joogteeyo xiriirka qoysaska raba iney akhristan wargeliye (flyers).
4. Inta suuragalka ah, marka aad adeegga bixineyso istacmaal luqadda beeshaas adigoo istacmaalaya mutarjum ama shaqaale si wanaagsan ugu hadlayo luqadda beeshaas.
5. Xooji xiriirka lala leeyahay ururrada caafimaad iyo dib-usoo-nooleynta jirka ama maskaxda, sida Bloorview MacMillan Children's Centre, Surrey Place Centre, iyo Cisbitaalka Sick Children. Inkastoo hey'adda Community Living Toronto ay is yaqaanaan hey'adaha lasoo xusay, haddana waxaa cadaatay in dadka loo fidiyo adeegga in aan lala socodsiin xogta hey'adahaas.
6. In la xoojiyo xiriirka lala leeyahay dugsiyada Toronto. Dad badan oo dugsiyaada ka tirsan ayaa lasoo xiriira Community Living Toronto, laakinse waxaa muuqata iney jiraan cillado la xiriira adeega CLT u fidiso beelaha laga tiro badan yahay, sidaas darteed waxaa loo bahan yahay in hey'adda ay dareen dheeraad ah u yeelato baahida caruurta muhaajiriinta iyo dhallinyarta naafo ka ah maskaxda.
7. Waxaa jiraan laba qodob oo la xiriira wargelinya Beelaha laga tiro badan yahay: (1) la xiriirka qoysaska iyo shaqsiyaadka ku nool deegaannada u gaarka ah beelahaas ama ku xiran ururrada adeegga ee beelo dhaqameed; (2) Gaarista dadka naafada ah iyo reerkooda

⁶ Booqo http://www.toronto.cmha.ca/c_what_we_do/wwd_publications.asp

oo ka gaabsanayo iney hey'adaheena lasoo xiriiraan tuhumo ay ka qabaan awgeed. Sidaas darteed waxaa lagama maarmaan ah in la helo tabahii lagu gaari lahaa

8. Wakiillada ururro badan oo kasoo qeybgalay wareysiga iyo kullana-kooxeed (focus groups) waxey CLT siiyeen meeshii lagu kulmayay, waxeyna sameeyeen barnamijyo tacliimeed iyo aqoon isweydaarsi, dhanka Soomaalida waxaa xusid mudan Dixon Community Services oo ku taal meel u dhow degaannada Soomaalido ay degto iyo dejinta Beesha oo Jimco kasta shir isugu keenaan "koox waayeel ah." Sidoo kale Ururka Naafada ah ee Tamil iyo Shiineyska xiriir fiican ayay la leeyihiin CLT.
9. Waxaa kaloo lagu taliyay in la sameeyo video oo dad Soomaali ah, Tamil iyo Shiineys oo xaaladooda ka sheekeynayaan. Maadaama beelo-dhaqameedyada gudahooda ay ka jiraan caqabooyin, in shaqsiyaad beelahaas ka mid ah ay xil gaar ah iska saaraan sidii loo sixi lahaa fekerrada malo-awaalka ah oo ay aaminsan yihiin.
10. Seddaxda beelood waxey qabaan xiriir-warfaafin oo aad u wanaagsan sida wargeysyo, raadiyo iyo websiteyo oo xubnaha beelhooda dhegeystaan ama akhristaan. Soomaalida gaar ahaan waxey beeshooda ku wargeliyaan iyagoo dabayaaqada todobaad waliba ay ka wargeliyaan dad badan Raadiyaha CHIN AM 1540. CHIN waxa kaloo sameysaa barnaamij Cantonese ah 1:00 ilaa 6:00 galabnimo ee maalin kasta. Barnaamijyada Tamil waxaa laga maqli karaa Raadiyo laga gadan karo dukaamo ay leeyihiin Tamilka. Teknolojiyooyinkaas oo dhan waxey u suuragelinayaan in dadka la wada gaaro, gaar ahaan, kuwa ka baqayo iney si toos ah ula xiriiraan ama si toos ah u weydiiyan su'aalo ururrada beelhooda.
11. In lala shaqeeyo ururrada beelo dhaqameedka ah si loo dhiso kooxo gargaara dadka naafada ah iyo qoysaskoodaba. Taasi waxey suuragelineysaa in dadka naafada ah ay is-qarinta kasoo baxaan, lana xiriiraan kuwa sidooda oo kale ah.
12. In la aruuriyo wixii macluumaad ah ee ku saabsan beelo-dhaqameedka oo raba iney ka faa'ideystaan wargelinnada Community Living Toronto.
13. In la xaqiijiyo in Community Living Toronto ay markasta ay tahay hey'ad tacliimeed. Sidaas darteed, hey'adda waa inay lahaato shaqaale u joogteeya xogta iyo aqoonta, isla markaana waa iney sameyso baaritaan la xiriira adeegyada dadka. Sidoo kale, waa iney ku dadaashaa kobcinta shaqaalaha si ay ugu dallacaan jagooyinka maamulka ee isla hey'adda.

V. Gebagebo

Warbixintan iyo daraasadda ay xumbaarsan tahayba waxey ku saabsan tahay waxyaabaha ay beelaha Soomaalida, Shiineyska iyo Tamilka oo ku nool Toronto ay la kulmeen iyo fekradaha ay ka qabaan naafo-maskaxeedka. Waxaa kasoo shaac-baxay, iyadoo saddexda beeloodba ay wada qabaan, in inta badan uu qofka naafada ah iyo qoysaskoodaba ay la kulmaan gacan-bidaxeyn iyo/ ama takoorid.

Dabeecad-dhaqameedka qaarkood oon caawineyn ama kasoo horjeeda dadka naafada ah iyo qoysaskoodaba waa kuwa soo-jireen ah oo jiilalka kala duwan ay ka dhaxleen xagga diinta, falsafadda, xagga maamulka iyo sheekooyin-dhaqameedka.

Mashruucan wuxuu tilmaamaya baahida beelaha quseysa ay u qabaan iney abaabulaan qaabkii ay u gargaari lahaayeen una taakuleyn lahaayeen dadka naafada ah iyo qoysaskoodaba. Meelaha qaarkood, sida dhinaca caafimaadka maskaxda, guulo ayaa laga gaaray. Haseyeeshee, waxaa lama huraan ah in beelahu ay ka faa'ideystaan waxna ka bartaan sannooyinka faraha badan oo waayoaragnimada ku dheehan tahay oo ururrada sida Community Living Toronto ay yeesheen.

Sidoo kale, si' hey'adaha adeegga oo hormuudka ah (mainstream agencies) ay wax ka qabtaan baahida beelaha laga tiro badan yahay, waxaa muhiim ah iney muujiyaan maskaxfurrin iyo iney aqoon-kororsadaanba. Sidaas darteed, waa iney helaan qaababkii ay u raaligelin lahaayeen baahida dhaqameed oo beelahaasi qabaan, taasoo la'aanteed ay dhib ahaan doonto in beelo dhaqameedyadaas ay isu arkaan in lasoo dhoweynayo. Waxaa kaloo muhiim ah in hey'adaha adeegga oo hormuudka ah (mainstream agencies) ay adeegsadaan qaab maskax-furrin oo ay ku garan karaan dabeecadaha iyo aragtiyada ay beelo dhaqameedyada ka qabaan dadka naafada ah , kaddibna ay asiibaan sida loo wanaajin karo, iyadoon mararka qaarkood ay dhinac marayaan waxa ay rabaan beelaha laga tiro badan yahay ama kuwa baaxadda weyn.

Sida muuqata, arrintu ma sahlana mana ay noqon doonto mid muddo dhow lagu meelmarin karo, waxeyse u baahan tahay in leysla helo sidii loo wada xajoon lahaa loona heli lahaa is-afgarsho iyo is- aamin. Sidoo kale, waa in lagu dadaalaa lana baadigoobaa sidii loola yeelan lahaa dadka naafo maskaxeedka qaba iyo qoysaskoodaba xiriir wanaagsan. Machadka Roeher, waxey ku rajo weyn tahay in daraasadda mashruucan ay noqon doonto tilaabadii ugu horeysay oo ay ugu googol-xaareyso adkaynta wada xaajoonta iyo wadashaqeynta, iyo barashada intaba.

VI. Tixraac

Atkinson, D.R., Maruyama, M., and Matsui, S. "The Effects of Counselor Race and Counseling Approach on Asian Americans' Perceptions of Counselor Credibility and Utility," in *Journal of Counseling Psychology*, 1978, 25, 76-83.

Beimans, H. (2000). The process of employment rehabilitation of torture survivors. In Omega Health Care Centre, Graz. *Mental health community and culture in the EU member states*. Available:

Bell, T.S., Branston, L.K., Newcombe, R.G. & Barton, G.R. (1999). Intervention to improve uptake of breast screening in inner city Cardiff general practices with ethnic minority lists. *Ethnicity and Health*, 4(4), 277-265.

Botan, A.A. (2002). Address to the Seventh International Congress of Somali Studies. Quoted in http://www.globalwarmingmedia.pwp.blueyonder.co.uk/somalia/seventh_int_congress_york.htm, accessed 11/21/03.

British Broadcasting Corporation London (2003). *Somali London*. Available: http://www.bbc.co.uk/london/yourlondon/unitedcolours/somali/welcome_history.shtml, accessed 10/11/03.

CBC News (2003). *Black crime in Toronto: A deathly silence*. Available: <http://www.cbc.ca/witness/silence/crime.html>, accessed 11/11/03.

Canadian Immigration Hotline (1993). *Somali illegals: The U.S. doesn't want them, but Canada does*. Available: www.canadafirst.net/back_issues/hot-51.txt, accessed 11/11/03.

Canadian Mental Health Association (2003). *Breaking barriers: Ethno-cultural materials tool kit*. Available: http://www.toronto.cmha.ca/c_what_we_do/wwd_breaking_barriers_articles.asp, accessed 12/11/03.

Carey, E. (d/u). *Race, income splits Toronto, study warns*. Available: <http://www.geocities.com/CapitolHill/6174/racepoor.html>, accessed 11/11/03.

Clement, D. (1999). *Toronto at a turning point: Demographic, economic and social trends in Toronto*. Toronto: United Way of Greater Toronto.

Collacott, M. (2002). *Canada's immigration policy: The need for major reform*. Vancouver: The Fraser Institute.

Elmi, A.S. (1999). *A study on the mental health needs of the Somali community in Toronto*. Toronto: York Community Services & Rexdale Community Health Centre. Available: <http://ceris.metropolis.net/Virtual%20Library/health/elmi1.pdf>, accessed 11/21/03.

Geromino, J., Folinsbee, S. & Goveas, J. (2001). *A research project into the settlement needs of adult immigrants with limited literacy skills in their first language who have settled in the Greater Toronto Area*. Toronto: The Canadian Multilingual Literacy Centre.

Giddens, A. (1976). Introduction. In M. Weber (1930/2002), *The Protestant ethic and the spirit of capitalism*. Routledge.

Gillette, M.B. (2002). *Between Mecca and Beijing: Modernization and consumption among urban Chinese Muslims*. Stanford University Press.

Griffiths, D.J. (2000). Fragmentation and consolidation: The contrasting cases of Somali and Kurdish refugees in London. *Journal of Refugee Studies*, 13(3), 281-302.

Health Canada (2003). *Supporting self-care: The contribution of nurses and physicians*. Available: www.hc-sc.gc.ca/hppb/healthcare/pubs/selfcare/4en.htm, accessed 12/11/03.

Howard-Hamilton, M. (d/u). *Research in multicultural counselling*. Available: <http://ericass.uncg.edu/research/howard.html>, accessed 07/11/03.

Immen, W. (2000). Somalis pitch in for mutual aid. *Globe and Mail*, Dec. 6, 2000. Available: www.somaliawatch.org/archivedec00/001226101.htm

Israelite, N.K., Herman, A., Alim, F.A., Mohamed, H.A., Khan, Y. & Caruso, L. (1999). *Resettlement experiences of Somali refugee women in Toronto*. (Unpublished paper).

Howard-Hamilton, M. (d/u). *Research in multicultural counselling*. Available: <http://ericass.uncg.edu/research/howard.html>, accessed 07/11/03.

Leong, F.T.L. (1986). Counselling and psychotherapy with Asian Americans: Review of the literature. *Journal of Counselling Psychology*, 33, 196-206.

Leung, P. Asian Pacific Americans and Section 21 of the Rehabilitation Act Amendments of 1992. *American Rehabilitation*, 1996, Spring, 2-6.

London, H. & Devore, W. (1988). Layers of understanding: Counselling ethnic minority families. *Family Relations*, 37, 310-314.

McGown, R.B. (1999). *Muslims in the Diaspora: The Somali communities of London and Toronto*. Toronto: University of Toronto Press.

Mind (2003). *About Mind*. Available: <http://www.mind.org.uk/About+Mind/>, accessed 10/11/03.

Morten, G., and Sue, D.W. *Counseling American Minorities*. Dubuque, Iowa: Wm. C. Brown, 1979.

Ng, K.S. (1999). *Counselling Asian families from a systems perspective*. Alexandria, Virginia: American Counselling Association.

Opoku-Dapaah, E. (1995). *Somali refugees in Toronto: A profile*. Toronto: York Lanes Press.

O'Reilly, F. (2003). Somali's hearts call them home. *Toronto Star*, Aug. 24, 2003.

- Osaki, K. (1997). When refugees are women: Emergence of the issue on the international agenda. *Refuge*, 16(4), 9-16.
- Patterson, C.H. (1996). *Multicultural counselling: From diversity to universality*. *Journal of Counselling and Development*, 74, 227-231.
- Ponterotto, J.G. & Casas, J.M. (1991). *Handbook of racial/ethnic minority counselling research*. Springfield, IL: Thomas.
- Reitz, J.G. & Lum, J.M. (2001). *Immigration and diversity in a changing Canadian city: Social bases of inter-group relations in Toronto*. Available: <http://www.utoronto.ca/ethnicstudies/Idiversity.corrected.pdf>, accessed 05/18/2004.
- Settlement.org (2003). *Looking at health care*. Available: <http://www.settlement.org/cp/english/somalia/health.html>, accessed 11/21/03.
- Siad, Abdulrazak A. 1991. *Findings on the Somali Community in the City of York*. York Community Services. June 1991. 42 pp. {510}
- Silveira, E. & Allebeck, P. (2001). Migration, ageing and mental health: An ethnographic study on perceptions of life satisfaction, anxiety and depression in older Somali men in east London. *International Journal of Social Welfare*, 10(4), 309-320.
- Silveira, E. & Ebrahim, S. (1998). A comparison of mental health among minority ethnic elders and whites in East and North London. *Age and Ageing*, 27(3), 375-383.
- Silveira, E. & Ebrahim, S. (1995). Mental health and health status of elderly Bengalis and Somalis in London. *Age and Ageing*, 24, 474-480.
- Somali Immigrant Aid Association (d/u). *A word from Executive Director of S.I.A.O. Mahad Yusuf*. Available at <http://webhome.idirect.com/~siao/index.html>, accessed 06/15/2004.
- Statistics Canada (2003). *Proportion of foreign-born population, census metropolitan areas*. Available: <http://www.statcan.ca/english/Pgdb/demo46b.htm>, accessed 05/17/2004.
- Sue, S. & Zane, N. (1987). *The role of culture and cultural techniques in psychotherapy*. *American Psychologist*, 42, 37-45.
- Tak-fai Lau, J. & Cheung, C. (1999). Discriminatory attitudes to people with intellectual disability or mental health difficulty. *International Social Work*, 42(4), 431-444.
- The Roeher Institute (2003). *Job integration for persons with disabilities from ethno-racial communities: Final report*. Toronto: Author.
- Thompson, V.C. (1997). Independent and interdependent views of self: Implications for culturally sensitive vocations rehabilitation services. *Journal of Rehabilitation*, 63(4), 16-20.

The Roeher Institute (2003). *Job integration for persons with disabilities from ethno-racial communities: Final report*. Toronto: Author.

Thompson, V.C. (1997). Independent and interdependent views of self: Implications for culturally sensitive vocations rehabilitation services. *Journal of Rehabilitation*, 63(4), 16-20.

Van Lehman, D & Eno, O. (d/u). *Somali Bantu: Their history and culture*. Available: www.culturalorientation.net/bantu, accessed 11/21/03.

Virginia Refugee and Immigrant Health Program (d/u). *Somali Bantu: Potential health problems*. Available: <http://www.vdh.state.va.us/epi/rihp/bantu.pdf>, accessed 11/21/03.

Wilkes, J. (d/u). *Youth leader looks to roots for success*. Available: http://www.skillsforchange.org/news/articles/toronto_star_march_20_2002.htm, accessed 11/11/03.

Wong-Hernandez, L. & Wong, D.W. (2002). The effects of language and culture variables to the rehabilitation of bilingual and bicultural consumers: A review of literature study focusing on Hispanic Americans and Asian Americans. *Disability Studies Quarterly*, 22(2), 101-119.